Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare
AKADEEMIYAHA DHAQANKA

# XEERKII SOOMAALIDII HORE

WAXAA QORAY:

AXMAD SHEEKH CALI AXMAD (BURAALE)

Muqdisho, 1977

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare
AKADEEMIYAHA DHAQANKA

# XEERKII SOOMAALIDII HORE

WAXAA QORAY:

AXMAD SHEEKH CALI AXMAD (BURAALE)

Muqdisho, 1977

# Raad Raaca Buugga

Inkastoo xeerka Soomaalidii hore aanu qorayn oo uu ku kaydsanaa maskaxda odayaasha garyaqaannada ah iyo waxa garaadka oo dhan waxaanu Buuggan u cuskannay:

1) maah maahyahii iyo hadalladii murtida ahaa oo garta lagu qaybin jiray.

2) sheekooyinkii la kala dhaxlay oo Odayaashii garta goob jooga u ahaan ijray ay weriyeen.

3) waxyaalihiin qoraagu goob joogga u ahaa oo in-dhihiisa uu ku arkay isla markaana qoraaggu waxuu ku dadaalay inuu dhammaan xiriir la yeesho rag ka mid ah, Odayaasha ku nool dhulka soomaalidu degto Goboladiisa oo dhan.

Wuxuuna sheekooyin ka aruuriyey odayada soo socda dhammaantood.

| Magaca | Gobolka uu ka yimid | meeshuu kula kulmay |
|---|---|---|
| 1. Maxamed Xaaji Xuseen | Qabri Daharre | Xamar |
| 2. Xaaji Axmed Yacquub | Jubbada Hoose | » |
| 3. Xaaji Aadan Afqalooc | Sanaag | Ciirigaabo |
| 4. Cabdullaahi Axmed Weeyd | Togdheer | Xamar |
| 5. Cali Xuseen Maxamed «madoobe» | Bari | » » |
| 6. Sheekh Cali Axmed Gaacuur | Gedho | waa qoraag aabihii |
| 7. Xaaji Maxamed Axmed | Mudug | Xamar |

waxaan mahad weyn u celinaayaa ragga aan magacyadooda soo sheegay abaalkoodana magudi karo, hase ahaatee Eeba weynaan u weydiinayaa denbi dhaaf.

# A R A R

Umad kasta oo ku nool adduunka waxay soo martay marxalooyin kala duwan, ama se waxaa la dhihi karaa adduunka qudhiisa ayaa hadba heer marayey, hadbana ay ummadi ka talinaysay ama hogaanka u haysay. Heerkastana waxaa jiray Xeer iyo dhaqan la socda da'diisa, waxaan shaki ku jirin in uu heerba heerkii ka horreeyey wax ka bedelay dhaqankiisii, isla markaasna ay jireen waxyaalo heerka dambe uu ka shiidaal qaato heerkii ka horreeyey, waxaasu wax kasta ha ahaadeenee.

Haddaba ummad kasta waxaa lagama maarmaan ah in ay aqoon u leedahay wixii dadkoodii hore ay ku dhaqmi jireen ama ay wax ku qaybsan jireen ama sidii ay u noolaan jireen kifaaxoodii ay soo mareen iyo fikradahoodii intaba si ay uga shidaal qaataan wixii wanaag ahaa oo ay lahaan jireen iyo si ay isaga ilaaliyaan wixii xumaan ahaa oo kharribay dadkaas hore.

Waxaa jirta in xeerku yahay ama ahaan jiray holbowlaha Ummad kasta laguna dhaqmi jiray heer kasta oo la soo maray, Ummad kastana xeerkeedu ka duwan yahay xeerarka umadaha kale, hadba iska waafaqsanaadeen meelaha qaarkood.

Soomaalida oo ahaan jirtay weligeed dad dimoqraadiyada ku dhaqma waxay lahaan jirtay xeer wanaagsan oo diimoqraadi ah oo ay wax ku qaybsan jireen, waxaase jiray in uusan qornayn xeerkaasi uuna ahaan jiray mid maskaxda lagu hayo lana kala dhaxli jiray, waxaana taas na tusaya ama markhaati fur u ah maahmaayaha soomaalida iyo murtideeda.

Waxaana ka mid ahaa murtidaas:

1. (Gari laba kama wada qosliso)
2. (Midigtaada haddii lagula qabsado waa laga mud-dcaa)
3. (Xaajo nin aan xog ogaal u ahayn xirribaha ayuu ka ridaa)
4. (Ilaahow eex ha nooga tegin aqoon darrana hana-gu cadaabin)
5. (Wiilkaaga iyo Wiil gaalo garta waa loo siimaa)
6. (Xoolahaagu xerada ha kuugu jireen ama xeer ha kaaga maqnaadeen)
7. (Islaan iyo gaalo garta waa loo simaa garabkase looma simo)

Murtidaasi waxay na tusaysaa caddaaladdii soomaalidii hore iyo xeer wanaageedii, waxaana lagama maarmaan ah in la baaro xeer soomaaligii hore, si uusan u lumin loogana shidaal qaato.

Ujeeddada buuggani waxay tahay ama waxaa igu kallifay qoriddiisa in ay ku baraarugto da'da maanta joogta baarista xeerkii, hiddihii iyo dhaqankii soomaalidii hore, waxaanna rajaynayaa in ay ku dhaqaaqaan kana kaaftoomaan dhaqanka iyo xeerka ajnabiga oo ay ku hal qabsadaan in badan oo ka mid ah ayaga.

**Qore Axmed Sheekh Cali «Buraale»**

# T U S M O

**Cinwaanka** **Bogga**


Tilmaan gaaban . . . . . . . . . . . . 1
Warxumaadi isticmaarku qoray . . . . . . . . 2
Maxaa la yiraahdaa xeer . . . . . . . . . 3
Xrkii soomaalidii hore . . . . . . . . . . 3
Jaadadka xeerku u kala bixi jiray . . . . . . . 4
Xeer magaalo . . . . . . . . . . . . 5
Xeer Guud . . . . . . . . . . . . . 6
Dhiig iyo dhaqan maxay [illegible] . . . . . . . . . 6
Qareen yeelasho . . . . . . . . . . . . 8
Xeer gaar ahaaneed . . . . . . . . . . 9
Xeerkii reer guuraaga . . . . . . . . . . 10
Xaajo ugub ahayd [illegible] dayaal daaweeyeen . . . . . 11
Xeer beeraley . . . . . . . . . . . . . 13
Xeer xoclaaley . . . . . . . . . . . . . 14
Xeer gaddisley . . . . . . . . . . . . . 15
Xeer araheed iyo xeer ugaareed . . . . . . . 16
Xeer colaadeed . . . . . . . . . . . . . 17
Xeer fardooley . . . . . . . . . . . . . 19
Dhigniinsha la'aanta xeer soomaaligii hore . . . . . 20
Meesha uu ka soo fuli jirey xeer soomaaligii hore . . 21
Meesha lagu guddoomin jirey xeerka . . . . . . 22
Dhaqan galka xeerka . . . . . . . . . . 22
Ilaalinta xeerka . . . . . . . . . . . . 23
Gar naqa iyo ciddii naqi jirtey . . . . . . . 23
Habkii garta loo naqi jirey . . . . . . . . 24
Ku dhawaaqidda xukunka . . . . . . . . . 27
Rafcaan qaadashadii hore . . . . . . . . . 27
Muddada Rafcaanka . . . . . . . . . . . 28
Joogidda dhinacyada marka lagu dhawaaqayo xukunka 28
Fulinta xukunka . . . . . . . . . . . . 28

**Cinwaanka** **Bogga**


Xukunka sharciga Islaamka iyo soomaalidii hore . . 29
Soomaalidii hore iyo xeerka dhiigga . . . . . . . 30
Qadafka iyo xeerkii laga lahaan jirey . . . . . . . 32
Baajinta maraadada . . . . . . . . . . . . . . 34
Xaal . . . . . . . . . . . . . . . . . 34
Xeerka tuugada laga lahaan jirey . . . . . . . . 34
Hilbo qalasho ama hanti hur . . . . . . . . . . 36
Xeer kufsad . . . . . . . . . . . . . . 37
Xeer ergo . . . . . . . . . . . . . . . . 38
Raacdo iyo xeerkeedii . . . . . . . . . . . . 41
Qaybtii dhaqanka ee xeer soomaaligii hore . . . . 42
Xeer guur . . . . . . . . . . . . . . . . 42
Xeer xiskiisan . . . . . . . . . . . . . . 43
Xeerkii dumaasha . . . . . . . . . . . . . 46
Naag doonan iyo xeerkii ninkii la taga . . . . . . 46
Xeerkii yaradka . . . . . . . . . . . . . 47
Ujeeddada yaradka . . . . . . . . . . . . . 48
Xeer soomaaligii hore iyo qoyska . . . . . . . 49
Xeer soomaaligii hore iyo magta . . . . . . . . 51
Xeer soomaaligii hore iyo daaqa dhulka . . . . . . 52
Xeer soomaaligii hore iyo marti celinta . . . . . . 53
Kala aqoonsi . . . . . . . . . . . . . . 54
Xoolo iyo xeer soomaaligii hore . . . . . . . . 55
Xeraale iyo xeer soomaaligii hore . . . . . . . . 57
Xeer soomaaligii hore iyo beeraha . . . . . . . . 58
Xeer soomaaligii hore iyo maragga . . . . . . . 59
Qaybtii culummada . . . . . . . . . . . . . 60
Ajuurada dacwadaha laga qaadi jirey . . . . . . 60
Xaqul qalin . . . . . . . . . . . . . . . 61
Kharajka dacwadda . . . . . . . . . . . . 61
Xeer soomaaligii hore iyo kacaanka . . . . . . . 62
Gabagabadii buugga . . . . . . . . . . . . 62

# TILMAAN GAABAN

Dadka Soomaaliyeed oo dalkiisu yahay geeska Afrika, kuna tilmaaman dhul hodan ah, marka la eego ciiddiisa wanaagsan, xoolaha nool iyo ugaarta kala jaadka ah, webiyada biyuhu qulqulayaan, hawada dhexdhexaadka ah oo wanaagsan kuna habboon dalxiiska iyo tamashlaha, luubaanta udgoon, xabagta, xijida iyo waxyaalaha udugga leh oo dhan laguna magacaabi jirey qarniyaashii hore BILAADU BOONTI taasoo macnaheedu yahay dalkii udugga, waxay leeyihiin dadka Soomaaliyeed dabci u gaar ah taasoo ah caqli toosan, xariir wanaag, geesinnimo, waddaninnimo, nabad jacayl, xaq jacayl, xoriyad jacayl. Waxay xiriir ganacsi lalahaayeen walaalahood carbeed iyo adduun weynaha kalaba, markii dambana waxaa si nabad ah ku soo gaartay diinta Islaamka oo ku fidday dalka oo dhan, taasoo keentay in dadkii soomaaliyeed 100% ay noqdeen dad muslim ah oo haysta diinta Islaamka.

Dadka Soomaaliyeed, intii isticmaarka reer Yurub ka horaysay, iyagaa is xukumi jiray, taa markii isticmaarku qabsaday dalka oo uu u qaybshay shan meelood uma hoggaansamin dadka soomaaliyeed, kumana raalli noqonin xukunkii isticmaarka, ee iyagaa dhexdooda ka samaysan jiray heshiisyo iyo maslaxo waxaana aad iyo aad u yaraa dadka tegi jirey xafiisyada isticmaarku samaystay.

Haddaba dadka soomaaliyeed waxay lahaan jireen xeerar ay samaysteen iyagu oo ay isku xukumaan dhexdooda, sidoo kalana waxay lahaan jireen caadooyin wanwanaagsan oo la tixgelin jirey marka xeerka la dejinayo.

Xeerarkaas soomaaliyeed waxay ahaan jireen kuwa aan qornayn, hase ahaatee kama duwanayn kuwa qoran.

## WARXUMADII ISTICMAARKU QORAY

Isticmaarku wuxuu qoray, markuu ka hadlayey xeerarka Soomaalida, in Soomaalida xeerkeedu ahaan jiray is dil, is dhac, is boob iyo kala aargoosi, taasoo macnaheedu yahay in reerkii wax laga qaadaa asaguna wax soo qaadi jirey, kii wax laga dilaana asaguna wax soo dili jirey.

Wax la rumaysan karo ma aha in soomaalida xeerkeedu ahaa sidaas, sal iyo raadna ma laha waxaa uu qoray isticmaarku, waxaase jirta meel kasta ee ay joogto umadi inuu ka dhexdhaco dagaal ah laba qof ama laba kooxood, taasoo keenta dhimasho ama dhaawac, kala aargoosiguna taasuu ka dhashaa, sidoo kale lama waayo wax xoolo kala dhaca meel ummadi ku nooshahay, waxyaalahaasuna waxay ka mid yihiin waxa keena in la dagsado xeerar, haddaynan jiri lahayn dhibaatooyinkaa iyo kuwa la midka ah looma baahdeen xeer iyo dejintiisba.

Soomaaliduna, ummadaha adduunka ayadoo la mid ah waxay lahaan jirtay xeerar waqti kasta oo ay soo martay, mana jirin dhexdeeda is dil, is dhac iyo kala aargoosi ka duwan kan umadaha kale ee adduunka laga heli jirey ama haddaba laga helo.

Haddaba cidna ma rumaysan karto inay xeer u yihiin soomaalida ama u ahaan jireen dambiyada ay ka midka yihiin dhaca, dilka, kala aargoosiga iwm.

Xeer waxaa la yiraahdaa wixii loo degsaday in lagu dhaqmo ama lagu horjoogsado ama wax looga qabto dembiyada dhiciddooda, ama lagu kala saaro labadii ruux oo wax dhexmaraan.

Xeerka soomaalidu lahaan jirtey wuxuu ahaa mid ay caan ku ahayd inkastoo ay kala mid ahayd umadaha kale is dilka, is dhaca iyo kala aargoosiga.

## MAXAA LA YIRAAHDAA XEER

Xeer waxaa la yiraahdaa go'aanno tiirar ah oo laysu soo aruuriyey loona dejiyey nidaaminta dhaqdhaqaaqa iyo macaamilada dadka ku nool bulshadaas degsanaysa xeerkaas, taasoo ula jeeddadeedu tahay inuu ku noolaado qof kasta oo ka mid ah bulshada nabad, barwaaqo iyo bash-bash, iyo inuusan ku xadgudbin ruuxna ruux kale isla markaasna waa inuu u soo jiido bulshada oo dhan hore u mar.

Dejinta xeerka waxaa iska leh madaxda dalkaas awoodda xukunka u haysa. Fulinta xeerka waxaa iska leh xukuumadda waddankaas.

Haddaba waxaa kale oo u baahan in lays weydiiyo: ma jiraa dad iyo dal aan xeer lahayn? Ama ma jirtaa ummad aan lahayn madax u talisa? Jawaabtu waxay tahay ma jiro dad iyo dal aan lahayn xeer ha fiicnaado ama ha xumaado, mana jirto ummad aan lahayn madax u talisa inkasta awooddeedu ha la ekaatee.

Haddaba waxaan ogaanay inaan laga maarmi karin, umadina jiri karin madax la'aan iyo xeer la'aan, taasina waxay caddeynaysaa in soomaalidii horeetaba lahaan jirtay xeerar iyo madax u talisa sida umad kasta ay u lahaan jirtay xeer iyo madax.

## XEERKII SOOMAALIDII HORE

Xeerka soomaaliyeed wuxuu ahaan jirey mid aan qornayn waayihii hore, hase ahaatee kama duwanayn mid qoran, shay walibana wuxuu lahaan jirey qodob u gaar ah oo lagu qaado marka uu yimaado, wax walibana waxay lahaayeen xeer u gaar ah.

Xeerka waxaa goyn jirey duqowda ama akhyaarta mar-

haas madaxda ka ah dalka iyo dadka, waxaana lagu goyn jirey xeerka shir weyne ay ka soo qaybgalaan dadweynaha degaan gobolkaas ama degmadaas, waxaana lagu qaban jirey shirkaas tuulooyinka, ceelasha ama balliyada biyuhu galaan, ama meelaha kale ee biyaha leh, xeer walbana waxaa lagu magacaabi jirey meeshii lagu shiray markii la goynahayey, taasoo la dhihi jirey tusaale ahaan xeerkii «gadoon-dhawe», xeerkii «hareeri-hoosel», xeerkii «cakaaro».

## JAADADKA XEERARKU U KALA BIXI JIREEN

Soomaalidii hore waxay u yeeli jirtay wax la arko xeer gaar ah, iyadoo la tixgelinayo markaas caadada iyo dhaqanka la xiriira waxa uu ku saabsan yahay xeerkaasu.

Sidaas darteedna waxaa jirey xeerar farabadan oo kala jaad ah kuwaasoo kala ah: (1) xeer magaalo, (2) xeer beeraley, (3) xeer gadisley. (4) xeer dibad guuraa, (5) xeer dhalinyaro, (6) xeer geelley, (7) xeer lo'ley, (8) xeer ariley, (9) xeer araheed, (10) xeer colaadeed, (11) xeer fardooley, (12) xeer bulsho, (13) xeer guur xilo iyo xidid, (14) xeer suugaaneed, (15) xeer ergo.

Xeerarkaas oo dhan mid walba markii la galayo arrin ku saabsan wixii loo dejiyey ayaa lagu qaadi jirey, isla markaasna waxay u qaybsami jireen: xeer ciqaabeed iyo xeer madani.

a) xeer ciqaabeed waxaa la yiraahdaa xeerka lagu qaado qofka markuu dambi galo sida tuugada, dhaca iyo boobka, gabdhaha la xoogo iwm.

b) xeer madani waxaa la yiraahdaa xeerka wax lagu qaybsho marka laba ruux wax iska qaadaan ama isku qabsadaan ama ay deyn isu sheeganayaan.

Isla markaasna xeer kasta, ciqaab ahaa iyo madani ahaaba, wuxuu lahaan jirey hab u gaar ah oo loo qaado marka la gelayo dood ku saabsan asaga.

## XEER MAGAALO

Xeerka magaaladu waa ka duwanaa kan beeraleyda iyo kan dibad guuraaga, sida kan beeraleyda iyo kan dibad guraaguba u kala duwanaan jireen, taasna waxaa keeni jirey kala duwanaanshaha nolosha qolo walba ay ku nooshahay, wuxuuna ahaan jirey mid aan qorayn, sida kuwa kale aysan u qorrayn, waxayna lahaan jirtay magaaladu guddiyo kala geddisan oo u kala bixi jirey kuwo guud iyo kuwo gaar; tusaale ahaan waxaa jiri jiray guddi la dhihi jiray Odayada Magaalada, waxayna ahaan jireen kuwa gala ama u dhiiba guddi gala xaaja kasta oo soo gaarta, waxayna ahaayeen kuwa la oran jirey Guddi Guud. Guddiyada Gaar ahaaneedna waxay ahaayeen kuwo kala qaabilsan meelo kala gaar ah ama dadkii isku shaqo ahba waxay lahaan jireen guddi qaabilsan danahooda, una garnaqa labadii is qabata. Waxaa ka mid ahaan jirey guddiyadaas: guddiga kawaanleyda, guddiga dukaanleyda. Guddi kasta oo ka mid ah guddiyadaas wuxuu gali jirey gartii ka dhexdhacda qaybta uu guddiga u yahay, haddii ay dhamayn waayaan ayaguna waxay u diri jireen ama gaarsiin jireen guddiga Guud ee Magaalada.

Guddiyadaas, kuwo guud ahaa iyo kuwo gaar ahaaba waxaa lagu dhisi jirey doorasho, iyadoo marka la dooranayo la eegayo ninkasta maskaxdiisa iyo maamulkiisu sida ay yihiin.

## XEERKOODII IYO GARNAQOODII

Xeerkoodu wuxuu ahaan jirey inay u qaybshaan garta guddi gala oo ka gaara go'aan ku dhisan xeer ay horay ugu dagsadeen magaaladoodaas, waxaase arrintu u baahnaan

jirtey, marba hadday reer magaalo yihiin inay arrintoodu ku dhammaato wax la yiraahdo sulux; marka horese waxay dhegaysan jireen doodda labada dhinac iyo marag iyo caddayn wixii la keeno.

Garta reer magaalku waxay ahaan jirtey mid ka fudud tan reer guuraaga, go'aanka reer magaaluhuna wuxuu ahaan jirey mid ka sahlan kan reer miyiga, wixii ay go'aan ka gaari waayaana waxay u gudbin jireen guddigooda sare.

## XEER GUUD

Soomaalidu waxay lahaan jirtay xeer guud iyo xeer gaar amase wuxuu u qaybsanaan jirey xeerka soomaalidu xeer guud ahaaneed iyo xeer gaarahaaneed, taas oo ah in ay jiri jireen xeerar ay ka wada siman yihiin, isla markaana ay jireen xeerar u kala gaar ah gobollada iyo degmooyinka.

Waxaa ahaan jirey xeer guud ahaaneed xeerarka ku saabsan dhiigga iyo dhaqanka guud ahaantooda, hase ahaatee laamaha ka farcama dhiigga iyo dhaqanka waa laysku khilaafsanaan jirey xeerkooda, taasoo gobol walba ama degma walba si gaar ah u ahaan jirtay.

## DHIIG IYO DHAQAN MAXAY YIHIIN ?

Sida la ogsoon yahay xeerarka adduunka waxay ku dhisan yihiin ama tixgeliyaan shan waxyaalood ama shay oo ay ka soo fulaan ama ka yimaadaan waxyaalaha lagu dacwoonayo oo madaniga ah, waxayna yihiin shantaas:

1) fal sharci darro ah;

2) heshiis dhexmaray laba dhinac;

3) qof sabab la'aan uga faa'iidaystay qof kale ama ku faa'iidaystay sabab la'aan;

4) ballan ruux qaaday ama qofka wax korka iska saaray isagu;

5) wax uu xeerku waajibiyey sida: nafaqada caruurta la dhalay oo kale;

Xeerarka madaniga ee adduunka shantaas qodob ayuu u yaqaanaa waxyaabaha dacwo ka dhalan karto, hase ahaatee xeerkii soomaalidii hore ee madaniga ahaa oo ahaa ku aan qornayn wuxuu u kala qaybin jirey waxyaabaha laysku haysto ama lagu dacwoonkaro laba shay oo keli ah:

1) dhiig; 2) dhaqan.

1) dhiiggu wuxuu ahaa ama ay dhihi jireen odayadii garta naqi jirey ee soomaalida ahaa, wixii ah fal sharci darro oo lagu sameeyo qof banii aadan ah;
2) dhaqanna waxay dhihi jireen wixii ah xilo iyo xoolo, waxaana dhaqanka dhexdiisa ku jiray affartii qodob oo kale, falka sharci darrada ah moogiye oo ah kii shanaad oo ka mid ah qodobbadii shanta ahaa oo ay tixgelisay qawaaniinta madaniga ah ee adduunyada.

Markii ay garta qaadahayaan, odayadii hore ee soomaaliyeed waxay weydiin jireen ninka soo dacwooda: «ma dhiig baad sheeganaysaa mase dhaqan»; haduu yiraahdo dhiig baan sheeganayaa waxay dhihi jireen «ma qudh baa mase waa qoon (dhaawac)»; markuu sheego midka ay tahay waxay weydiin jireen ama dhihi jireen «ma mooraa mise waa magan».

Hadduu yiraahdo waa dhaqan waxa aan sheeganaayo waxay dhihi jireen «ma magan baa mise waa mooro»; markuu

sheego midka ay tahay waxay weydiin jireen ama ay dhihi jireen «ma xilaa mise waa xoolo».

Mooro waxaa la yiraahdaa wixii qofku asagu leeyahay ama gurigiisa ka mid ah, maganna waxaa la yiraahdaa ama la dhihi jirey wixii soo magan gala ama uu la magan galo ruux kle, asaga ayaana u dacwoon jirey sida wixiisa oo kale.

Odayadu waxay qaadi jireen garta kaddib markii ay u caddaato nooca ay ka tahay waxyaalaha ay weydiiyeen ruuxii dacwoonahayey.

Arrimahaas aan soo sheegnay waxay ahaan jireen xeer guud oo ay soomaalidu kuwada dhaqmi jirtay.

## QAREEN YEELASHO

Markii garta la bilaabayo oo ay labadii dhinac soo hor istaagaan odayada garta qaadaya waxaa la weydiin jirey dhinacayada, ayadoo midba markiisa la weydiinayo in asagu isu doodayo iyo inuu qareen qabsanayo, waxaana af buuxa lagu dhihi jirey «ma nin baad agmanaysaa mase adigaa hadloonaya», midduu doorto ayaana arrinta lagu wadi jirey, waxayna gartu u qaybsanaan jirtay gar cadaawo iyo gar caadi ah; ama sokeeye, garta cadaawo waxaa la dhihi jirey oo kale «jilib carro», lamana kala kici jirin ilaa laga dhammeeyo mar hadday tahay gartu jilib carro, haddayse tahay gartu gar caadi ah, waxaa dhici jirtay ama bannaanayd in dib loo dhigo oo muddo kale loo qabto.

Waxaa lagu kala aqoonsan jirey garta, inay tahay gar caadi ah iyo in kale unugga xaajadu meesha ay ka timid; waxaa kaloo la eegi jirey qasiyadda ka taagan arrintaas inta ay le'eg tahay; haddii la arko inay keeni karto arrintaasu ama dacwaddaasu haddaan degdeg loo dhammayn dagaal dhexmara laba dhinaca, ama laba ruux, ama xoolo la kala qaado.

Waxaa la ogaan jirey markaas ama la aqoonsan jirey arrintaas inay tahay gar cadaawo ama jilib carro. Haddiise aysan ka muuqan dacwaddaas wax xamaasad ah amase ayna ka soo unkamin meel xun, waxaa loo aqoonsan jirey inay tahay gar caadi ah.

Hababkaas aan soo sheegnay waxay ahaayeen xeer guud ahaaneed oo ay ku dhaqmi jireen soomaalida oo dhan.

## XEER GAAR AHAANEED

Soomaalidu waxay lahayd xeer gaar ahaaneed, amase xeerar gaar ahaaneed kaas guud ka sokow. Waxaa jiri jirey in gobol walba ama degmo walba lagu arki jirey xeer hoosaad iyaga u gooni ah. Tusaale ahaan Reer Baraawe wixii ay ka helaan xeebta badda oo soo caariyey ama baddu soo tuftay, xeerkoodu wuxuu ahaa inaan lagu faragelin ninkii helay oo isagaa qaadan jirey; isla markaa Reer Boosaaso ama xeebaha Bari oo dhanba, wixii la helo iyagoo ka soo baxay badda, waxay dhihi jireen Boqorka ayaa leh, waxayna ka dejiyeen maah-maah ay ku yiraahdeen «BAD KASOO BAX BOQOR BAA LEH».

Waxa la sheegayo oo badda ka soo baxaya waa xoolaha ka lumaya maraakiibta iyo doonyaha badda dhexmaraya.

Tusaale kale: gabadha reer Hargeysa ama reer Burco waxaa lagu meherin jirey 15-20 halaad oo geel ah oo meher loo siin jirey, gabadha reer Gaalgacyana waxaa lagu meherin jirey marka la guursanayo 20-40 neef oo ari ah, gabadha reer Gadona waxaa lagu meherin jirey, sida badan, 4 qaalmood oo lo' ah. Taasi waxay ku tusaysaa inay jireen xeerar hoose oo kala gaar gaar ah, iyadoo isla markaana ay ku wada dhaqmayso soomaalidu xeerkii guud ahaaneed.

Sababta ay u lahaayeen xeerarkaas hoose oo kala gaar gaarka ah waxay ahayd:

— in degmo walba ama gobol walba uu lahaan jirey odayo iyo duqeeti amase rag wax garad ah oo ka shira ama ka taliya arrimihiisa, ayagaana u soo goyn jirey xeerarkooda, waqtigaasna uma suurtoobi karin inay meel isugu yimaadaan degmooyinka iyo gobollada oo dhan, maxaa yeelay gaadiid baan jirin, dalkuna waa kala fogaa, sidaas darteedna degmo walba odayadeedu waxay soo goyn jireen wixii iyaga dan la noqda ama ay u maleeyaan inay ku dhaqmi karto degmadoodu.

## XEERKII REER GUURAAGA

Soomaalidu waxay ahaan jirtey gabi ahaantdeeba, qarniyadi hore, dad reer miyi ah oo xoolo dhaqato ah, xeer soomaaliga asalkiisuna ayaga ayuu ka soo jeeday, sida hiddaha iyo dhaqankaba ayaga uu uga soo jeeday, waxaana ceeb la ahaan jirtay odayadii hore ee soomaaliyeed oo reer miyiga ahaa inay kala saari waayaan ama heshiisiin waayaan laba ruux oo is qabatay ama laba qolo oo is qabatay; waxaa kaloo ceeb la ahaa in gartooda la geeyo magaalo, sidaas darteedna waxay ku dadaali jireen inay daawo u helaan wax alla wixii dhibaato ah oo dhexdooda ka dhaca. Waxay dhihi jireen, markii ay dhibaato dhacdo «xaajadu ma curadbaa mise waa ugub», haddii la yiraahdo waa curad macnaheedu waxaa weeye: horaa loo arki jirey, daawadeedana waa la yaqaannaa, waxaana lagu daaweyn wixii awal lagu daaweyn jirey. Haddiise la yiraahdo waa ugub, macnaheedu waxaa weeye: weli lama arag ayadoo kale, wixii lagu daaweyn lahaana lama yaqaanno in hadda loo fikiro mooyaane.

Arrintaas ugubka ah odayadu aad ayey ugu dadaali jireen sidii ay ugu heli lahaayeen gar ay ku xukumaan, maxaa yeelay, xaaja kasta oo ugub ah aakhirka waxay noqotaa curad, ugu dambaystana odayadu daawo ayey u heli jireen xaajada ugubka ah.

## XAAJO UGUB AHAYD OO ODAYAAL DAAWEEYEEN

Waxay ka dhacday arrintaasi Waamo oo ah Gobolka Jubbada Hoose mar hadda laga joogo 60 sano, waxayna ahayd in nin dhallinyaro ah uu guursaday gabar, asagoo kula xididay aabaheed. Kaddib markii uu baxshay yaradkii oo loo aqal geeyey oo uu muddo yar qabay, waxay bilawday inay ka cararto ninkii. Markii muddo badan ay ka cararaysay, markii ay taptanaba uu aabaheed soo celinayey, ayaa wuxuu yiri maalintii dambe aabaheed «waxaa hooyadeed iiga furantahay inaanan kuu soo celinayn hadday mar dambe kaa tagto», markaa uu saas leeyahayna wuxuu keenay gabadhii oo ninkii ka maqnayd intii ayaama ah. Odagii markuu tagay oo uu ka tegay gabadhii iyo ninkii oo wada jooga ayuu ninkii inta xarig qaatay oo gabadhii labada gacmood uga xiray wuxuu ka soo laalaadshay udub dhexaadkii aqal soomaaligii ay ku hoyan jireen, markaasay waxay ku tiri: «sow mar uun xarigga iga furimaysid, miyaan un weligay ku xiyrnaan», markaasuu, inta xanaaqay ninkii oo middi qaatay oo gabadhii labada boqnood ka gooyey, kaddibna xariggii ka furay ayuu wuxuu ku yiri: «haddaba kac oo tag» markaas gabadhii meeshii ayey ku dhacday, qayla dhaantii ayaa gaartay reerihii oo dhan, waxaana soo gurmaday oo yimid meeshii dhibaatadu ka dhacday odayadii garta naqi jirey iyo dadkii xilkaska ahaa iyo ciddii gabadhu ka dhalatay iyo reerkii ninku ka dhashay.

Gartaasu waxay ahayd tii la dhihi jirey Jilib Carro loomana kala kicin ilaa iyo intii ay ka dhammaatay; isla markaas ma aysan ahayn xaajadaasu mid curad ah oo horay loo soo arkay, ee waxay ahayd xaajo ugub ah oo aan horay loo arag.

## GO'AANKII LAGA GAARAY GARTAAS

Si degdeg ah ayey u fariisteen odayadii, waxaana dood laga dhegeystay gabadhii aabaheed iyo ninkii qabay oo boq-

naha gooyey, dabadeedna waxaa guddoonkii u baxay odayadii.

Markay dhan kasta ka baareen arrintii, iyagoo tixgelinaya inay tahay xaajadu mid ugub, waxay go'aan ku gaareen sida soo socota:

1) in ninkaas gabadha uu qabay boqna gooyey uu gabadha xannaaneeyo oo uu baanto, baqal ay fuushana u yeelo;

2) in ninkaasu uusan guursan xilo kale oo aan ahayn gabadhaas, uusanna furin weligiis, dhaqaale gaar ahna uu u yeesho oo uu ka ilaaliyo wax dhibaato ah inay gaarto;

3- in gabadha aabaheed iyo ciddoodiiba aysan weydiisan ninkaas ama ayna ka damcin wax magdhaw ah ama dhiig la kala qaata ah ama aargoosi ah.

Sidaas ayey arrintii ku dhamaatay, labadii dhinacbana way aqbaleen, naagtiina ninkii waxay u dhashay 12 caruur ah oo u hana qaaday, isagoon naag kale la guursan, dhaqaalihii lagu xukumayna mariyey.

Sidaas waxay u yeeleen odayadu waxay ogaayeen haddii ninka laga qaato magdhawgii gabadha, waxaa dhici lahayd inuu iyada furo oo ciddoodu la tagto, kaddibna nin dan ma guursadeen maxaayeelay waa qof lugaha la', halkaas ayeyna ku dayacmi lahayd. Sidaas darteed odayadu waxay ku dadaaleen inay ka hormariyaan wax kasta gabadha noloshee-dii iyo mustaqbalkeedii iyo qoyska dhisnaantiisii.

Gartaasu waxay ahayd gar dhiig ah markii dhan la eego, marna dhaqan ah oo weliba xilo ka sii ah, taasoo aan ogsoonahay inay dacwadu u kala bixi jirtay: dhiig iyo dhaqan.

Dhiiggu wuxuu u kala bixi jirey qudh iyo qoon, dhaqankuna wuxuu u kala bixi jirey xilo iyo xoolo.

Odayadii gartaan galay waxay ku dadaaleen inay hagaajiyaan dhinicii dhaqanka, waxayna ka jeesteen dhinacii dhigga, hase ahaatee, dhan kasta oo la eegaba si wanaagsan ayey ku dhameeyeen, maxaayeelay qoyskii lama dumin, gabadhiina ma dayacmin, reerkiina waa tarmay, ninkiina ciqaab intii ugu filan waa uu arkay maxaayeelay sanooyin badan ayuu wuxuu fuulinahayey naag luga la'.

## XEER BEERALEY «1»

Beeraleydu waxay ahaayeen dad ka shiddo yar dadka reer guuraaga ah, nabadeedduna waa ay ka badnayd midda reer guuraaga, sidaas darteed, inkasta oo ay kala mid ahaayeen reer guuraaga xeerarka guud ahaaneed ee dhiig iyo dhaqanba, haddana waxaa u gaar ahaa beeraleyda xeerar, waxaana ka mid ahaa xeerkaas kuwa ku saabsan goobka oo ah marka beerta la wada falanayo ama la wada abuuranayo ama la wada goynayo, xeerarka lagu kala saaro soohdinta iyo xeer lagu qaado ninkii xoolihiisu daaqaan beeraha, waxayna dhihi jireen odayadii hore «nin bar leh iyo nin beer leh, nin bar leh baa gar-daran», taas oo macnaheedu tahay ninka xoolaha leh baa ka gardaran ninka beerta leh, maxaa yeelay ninka beerta leh beertiisu ma raadsan xoolaha ee xoolaha ayaa raadsaday beerta, sidaas ayeyena ku xukumi jireen inuu gardarrada leeyahay ninka xoolaha leh.

Ninkii ka soo qayb geli waaya goobka beeraha marka la abuurayo ama la falayo ama la goynayo, wuxuu ahaan jirey nin jebiyey xeerkii beeraleyda, waxaana lagu xukumi jirey qado wada deeqda raggii goobku ka dhexeeyey, wuxuuna qali jirey dibi, taasi waa markuu keeni waayo cudadaar la aqbali karo oo uu la baaqday.

«1» Eeg bogga 58aad ee buuggan.

Goobka micnihiisu wuxuu yahay, in beeraleydu maalin walba ay isugu tagaan nin beertiis ama laba iyo saddex nin beerahood oo ay ka qabtaan shaqadii ay u baahnayd beertu, maalintaas ayeyna ku dhammayn jireen shaqada ay beertu u baahan tahay. Ninka beertiisa la goobanayo wuxuu bixin jirey maalintaas cunto ay ka dhargaan dadka beerta goobanaya.

## XEER XOOLALEY

Xoolaha waxaa loola jeedaa geela, lo'da iyo ariga.(1) Dadka xoolaleyda ah oo ah dadka reer guuraaga oo aan horey u soo sheegnay xeerkooda, waxaan shaki ku jirin inay lahaan jireen xeerar ku saabsan xoolahooda, isla markaasna nooc kasta oo ka mid ah saddexda aduunyo wuxuu lahaan jirey xeer hoosaad gaar u ah isaga.

Waxaa ka mid ahaa xeerarkaas, xeerka baadida xoolaha ninkii hela iyo xeerka irmaansiga xoolaha marka la kala irmaansanayo, iyo xeerka gaadiid celiska, marka awrta lagu kala guurayo, iyo xeerka kala qoorsiga marka la kala qoorsanayo awrta, dibida iyo orgida, iyo xeerka shiraysiga marka ay ciduhu qalanayaan xoolahooda baahi awgeed.

Haddaba xeerarkaas waxay ahaan jireen xeerar ay degsan jireen oo ay ku dhaqmi jireen xoolaleydu, ayageyna u gaar ahaayeen.

Tusaale ahaan, xagga kala qoorsiga wuxuu imaan jirey marka nin xoolihiis ay rimay u baahan yihiin, geel ha ahaado ama lo' ha ahaato ama ari ha ahaado e isla markaasna uu jiro nin haysta laboodkii qoorta ahaa oo ay u baahnaayeen ninkaas xoolihiisu.

Waxaa xeer ahaan jiray in ninka xoolaha lehi u raadsado laboodka qoorta ah ninka iska leh, isla markaasna waxaa

---

«1» Xeerkii Fardaha Arag baalka 19

xeer ahayd ninka laboodka qoorta ah lehi inuu siiyo ninka xoolaha leh oo u baahan qoorta, mana jiri jirin wax lagu xiro bixinta qoortaas oo xoola ah ama nacfi kale ah, hase ahaatee, haddii ay tahay qoortu rati lagu guuro, oo cid kaligii ku ah, waxaa xeer ahaan jiray in loogu soo beddelo rati aan qoor ahayn oo uu ku sii guuro ninkii qoorta lahaa inta looga soo celinayo ratigii laga qoorsaday. Qoorta oo dhan xeerkeedu wuxuu ahaa in loo celiyo ninkii lahaa markii laga oofsado muraadkii laga lahaa. Wax magdhaw ah lama bixin jirin haddii si caadi ah oo uusan tacaddi ku jirin ay ku dhunto qoortii.

Waxaa taas la mid ahaa xeerka irmaanaysiga. Haddii nin xoolo ka irmaansado ninka leh, ma jiri jirin wax loo dhaafiyo xoolihiisii la irmaansaday, looma magdhabi jirin hadday u dhumaan si caadi ah, waxaana la is irmaansiin jirey saddexda adduunyaba.

Sidaas oo kale xeerkii gaadiid celisku wuxuu ahaan jirey markii ay guuraan ciduhu oo ay meel deggan, waxay siin jireen awrtooda dadkii ama cidihii laga soo guuray oo waayey markii hore awr ay ku soo guuraan oo ay ku soo raacaan cidaha soo guuray.

Waxyaabahaas oo dhan iyo kuwa la mid ah waxay ahaan jireen xeer gaar u ah xoolaleyda, waxayna ahaayeen xeerarkaasi dhaqan, markii aan xasuusano inay u kala bixi jireen dacwooyinku dhiig iyo dhaqan.

## XEER GADDISLEY

Gaddisley waxaa la dhihi jirey dad ka dhexeeya beled iyo baadiye, waxayna shaqadoodu ahayd inay inta baadiyaha xoolo ka soo iibshaan ay baladka geeyaan, amase inta balad ka gadaan, balad kale ka iibshaan waxayna ka mushtari jireen xoolaha nool, hargaha, badarka iyo subagga.

Xeerka gaddisleydaas wuxu ahaa mid ka duwan kan magaalada iyo kan miyiga labadaba markuu yahay dhaqan, hase ahaatee wuxuu u dhawaa kan magaalada, hadduuse yahay dhiig waxay kala mid ahaayeen soomaali weynta kale, maxaa yeelay dhiiggu wuxuu ahaan jirey xeer guud.

Haddaba geddisleydu waxay lahayd xeer fullis oo ku saabsan ganacsigooda iyo xeer kale oo ay ku tixgelinjireen asagana ganacsigooda. Tusaale ahaan geddisleyda waxaa u xeer ahaa in ayna isku fullusin xoolaha ay gadanayaan, haddii ayna ahayn dad colaadu ka dhaxayso ama aan is aqoon.

Waxaa kaloo xeer u ahaa gaddisleyda inaan la faro gelin ama aan laga gadan xoolo uu carbuun ka baxshey nin kale oo gaddisley ah.

## XEER ARAHEED IYO XEER UGAAREED

Arah waxaa la dhihi jirey dadka u safra carro baadiye ah, iyagoo ka raadsanaya wax dhirta baadiyaha ka baxa sida: caw guratada, miro guratada iyo xabag guratada.

Ugaarsatana waxaa la yiraahdaa ama la oran jirey dad u safra meel baadiye ah, iyagoo doonaya hilib uguureed oo ay soo diloodaan.

Haddaba labadaas qolo xeerkoodu wuxuu ahaan jirey mid u dhaw xeerka colka duulaanka ah, waxayna degsan jireen xeerkooda markii ay ka tagaan cidahooda, wuxuuna jiri jirey xeerkaasu ama lagu dhaqmi jirey inta ay ku maqan yihiin safarka, wuxuuna ku saabsanaan jirey xeerkaasu, sidii loo qaybsan lahaa wixii la helo iyo sidii loo xannaanayn lahaa ruuxii jirada, waxayna samaysan jireen nin madax ah iyo guddi la taliya ninkaas.

## XEER COLAADEED

Xeerarka colaaddu waa ay farabadnaayeen, waxayna u kala bixi jireen, kuwo ku saabsan colka isku dhinaca ah dhexdiisa, iyo kuwo ku saabsan labada col ee iska horjeeda dhexdooda. Waxay kaloo u kala bixi jireen xeerarkaasi, kuwo jogto ahaan jirey oo guud ahaan jirey, sida caruurta, naagaha iyo waayeelka in aan la dilin, ama aan la dilijirin markii colku cidaha weeraro; iyo mid la degsado marka colku isu soo baxaayo, sida: wixii laga yeeli lahaa ninkii la qabto iyo ninkii asagoo dhaawac ah la helo.

Colku markii uu baxaayo, waxaa xeer ahaan jirey in uu doorto nin madax ah, lana oran jirey «abaanduule». Ninkaasuna wuxuu ku maamuli jirey colkiisa hab milleteri.

Waxaa colku guddoonsan jirey xeerarkii uu ku socon lahaa, wuxuuna isku guubaabin jirey inaan laga tegin, markii la galo reerihii duullaanka lagu ahaa, wixii xeer soomaaliyeed ahaan jirey, waxyaabahaas oo ay ka mid ahaayeen: inaan la furan lana dilin dadka duqowda ah, naagaha iyo caruurta inaan wax la yeelin; inaan la dilin nin dhaawac ah oo la helay ama nin la qabtay asagoo fayow.

Taasi waa markii colku u duulo in uu wax laayo, hase ahaatee markii colku u duulo inuu xoolo soo dhaco, oo uusan dad laynin, waxaa xeer u ahaan jirtay sida soo socota: markuu colku qaado geela, tusaale ahaan, waxaa ka daba imaan jirey nimankii geela lahaa, saddex xaalo midkood ayeyna noqon jirtay arrintu:

1) In uu bato colka geela laga soo qaaday oo ka daba yimid;
2) In uu bato colka geela qaaday;
3) In ay isla ekaadaan labada col.

Haddii uu bato colka geela lahaa oo laga soo qaaday,

colka geela qaaday waa ka dhexbixi jirey geela, wuxuuna joogsan jirey meel ka durugsan geela, waxayna soo dirsan jireen nin ama laba nin oo ergo ah, waxayna u imaan jireen colkii geela lahaa oo looga dhexbaxay geeloodii waxayna ku dhihi jireen «Waxaan nahay niman nafi hayso, baahi darteed, geeliiniina waad naga ridateen ee geela naga siiya hilbo aan qalano». Meeshaas ayaa lagu siin jirey neef ama labo ay qashaan weyna la tegi jireen.

Haddii uu bato colka geela qaaday oo uu ka bato colkii geela lahaa, waxaa dhici jirtay inay sidii si le'eg nin ama labo nin oo ergo ah soo dirsadaan colka geela laga soo qaaday, waxayna ku dhihi jireen «warhooy! nooga taga awrta iyo irmaanka, geela intiisa kalana la taga», waana aqbali jiray colka geela wataa sidaas.

Haddii ay is le'eg yihiin labada col, waxaa dhici jirtay in lawada xaajoodo, laguna heshiiyo in la qaybsho geela, oo goloba bar qaadato, waxaana la dhihi jirey qaybtaas «qaybtii haad qadis», taasoo macnaheedu yahay in haadku ka dhergi lahaa hilbo rag haddii aan sidaas la yeelin.

Ula jeeddada laga leeyahay go'aannadaas saddexda ah waxay ahaan jirtay in uusan dhiig daadan oo uusan is laynin dadku.

Waxaa arrintaasi dhexmari jirtay dadyawga uu ka dhexeeyo xoolo la kala dhaco amase dhac xoolaad, hase ahaatee uusan dhexmarin dhiig dad ama dad layska laayo.

Waxaad ka garan kartaa in soomaalidu ahayd dad walaalo ah oo is jecel, nabaddana jecel, nafta bani aadankana qaali la ahayd.

Xeerkaas colaadda waxaa ka mid ahaan jirey in ninka faraslaha ahi uu qaadan jirey, saami ahaan ninka lugta ah

labanlaabkiis oo ah xoolaha la soo dhaco, ninka buntukha wa-
lana wuxuu qaadan jirey ninka waran laha ah labanlaabkiis. Wuxuuna ahaa xeerkaasi ku joogto ah oo guud ahaaneed.

Waxaa kaloo ka mid ahaa xeerarka colaadda in ninkii la qabto arrintiisa looga dambayn jirey ninkii qabtay, siduu yiraahdo ha la yeelo ayaana la yeeli jirey.

Colaaddu waxay u kala bixi jirtay: colaad sokeeye iyo saqirro gawrac. Colaad sokeeye waxaa la dhihi jirey midda dhexmarta ama dagaalka dhexmara laba qolo oo aan kala dhe-erayn.

Saqirro gawrac waxaa la dhihi jirey colaadda dhexmarta laba reer oo kala fog, xaalkooduna isku xumaado, waxayna u badnaan jireen dadkaasi in aysan yeelan wax la yiraahdo magan bariis ama ninkii la qabto oo aan la sii daynin, mararka qaarkoodna waxaa dhici jirtay in ninkii la qabto aan la di-lin, hase yeeshee lagu baddasho xoolo le'eg magtiisa oo 100 halaad ah oo loo aqoon jirey «madax furasho».

Maxaabiista oo la isdhaafsado oo col walba wixii uu qab-tay uu dhaafsado ama uu ku furto wixii asaga laga qabsaday oo colka kale ka qabsaday, waxay ahaan jirtay wax dhici jirey laguna dhaqmi jirey.

## XEER FARDOOLEY

Farduhu waxay ahaan jireen wax ay soomaalidu qiimo weyn u yeeli jirtay, waxayna ahaayeen kuwa loogu isticmaalo duulaanka, safarka dheer iyo tamashlaha. Fardaha soomaa-liyeed waxay ku badnaan jireen gobolka Nugaal, Waqooyi Bari iyo Sanaag, waxaana lagu gadan jirey neefka fardaha ah oo aad u wanaagsan shan geel ah ugu yaraan.

Fardaha oo soomaalida agteeda ku lahaan jirey sharaf

weyn waxaa lagu dhaqi jirey xeer u gaar ah ama xeerar u gaar ah, waxaana ka mid ahaa xeerarkaas: xeer ku saabsana kala caariyeysiga fardaha iyo dagaal ku galka fardaha. Haddii col soo weeraro degmada fardahu ku nool yihiin, waxaa dhici jirtay in fardaha lagu daafaco colkaas, haddii colkaasi xoolo la tagana, fardaha ayaa lagu raacdayn jirey. Marka sidaas la samaynayana lama oran jirin yaa leh faraskan ama fardahaan, ee waxaa la qabsan jirey ama la fuuli jirey fardihii la soo gaaro, cidda fardahaas lahaydna ma dhihi jirin: «maxaa fardahayga loogu duulay» maxaa yeelay waxay ahayd arrintaasi xeer horay loo goostay.

Ciddii fardaha ku duushay oo ku soo dhacsatay xoolaheedii, waxaa xeerku ahaan jirey inay ciddii fardaha lahayd u geeyaan iyaga oo u subkay, oo baad iyo biyo wexey u baahnaayeen siiyey.

## DHIGNIINSHA LA'AANTA XEER SOOMAALIGII HORE

Xeer soomaaligii hore wuxuu ahaa ama ahaan jirey, ku guud ahaaneed iyo ku gaar ahaaneedba, mid aan dhignayn.

Odayadii soomaaliyeed ee hore madaxa ayey ku hayeen, kuna hayn jireen xeerka, da'ubana da' bay ka dhaxli jirtay, waxaana tiirar u ahaan jirey, sidii aan horay u soo sheegnay inay yiraahdaan «xaajadu ma dhiigbaa mise waa dhaqan», hadday dhiig tahay « ma qudh baa mise waa qoon», hadday dhaqan tahay «ma xilaa mise waa xoolo», waxay kaloo oran jireen «ma mooraa mise waa magan».

Markii ay ogaadaan nooca ay tahay iyo waxa ay tahay waxay oran jireen «xaajadu ma curadbaa mase waa ugub».

Sababta ugu wacnayd qornaansha la'aanta xeerka ama ay la qori waayeen waxay ahayd:

1) Afka soomaaliga oo aan qornaan jirin;

2) Dadka wax qora oo yaraa markaas;

3) Buugta iyo qalmaanta waxa lagu qoro oo aan jiri jirin markaas, ama aan ku badnayn soomaalida dhexdeeda.

Inkasta oo uusan qornayn xeerkaasu, haddana kama duwanaan jirin mid qoran.

## MEESHA XEERKA SOOMAALIDII HORE KA SOO FULI JIREY

Xeer soomaaligii hore wuxuu ka soo fuli jirey dhaqanka, taariikhda iyo hiddaha iyo caadooyinka ay lahaan jirtay soomaalidii hore, marka ay xeer degsanayaanna, soomaalidii hore waxay tixgelin jireen waxyaalahaas oo dhan.

Waxaa kaloo la tixgelin jirey ama xeerarka soomaalida calaaqo weyn ku lahaa shareecada Islaamka, taasoo meela badan ay ayada wax ku qaybsan jireen, waxaana ka mid ahaa waxyaalihii shareecada Islaamka lagu qaybsan jirey diyada, dhaxalka iyo wixii qoyska ku saabsan oo dhan, sida: ninkaaxa, furidda iwm.

Ma jirin wax calaaqo ah oo ka dhaxayn jiray xeer soomaaligii hore iyo xeerarka shisheeyaha.

## CIDDII GUDDOOMIN JIRTAY XEERARKA

Waxaa guddoomin jirey xeerarka odayada wax garadka ah amase ciddii wax garad ah oo dhan, dhallinyaro ama waayeel miday ahaataba, waxaana xeerarkaas la guddoonsan jirey markii la arko in loo baahan yahay amase la arko dhibaatooyin taagan markaas oo lagama maarmaan ay tahay in loo dejiyo xeer looga hortago. Xeerka markii la guddoomiyo wa-

xaa la gaarsiin jirey dadweynaha deggan meeshaas, waxaana dhici jirtey in qof walba u hoggaansamo xeerkaas la goostay.

## MEESHII LAGU GUDDOOMIN JIREY XEERARKA

Sida aan soo sheegnay xeerka waxaa la guddoonsan jirey markii la ogaado in loo baahan yahay ama ay timaado dhibaato lagama maarmaan ay tahay in loo dejiyo xeer looga hortago, waxaana dhici jirtey in la qalqaaliyo shir weyne ay isgu yimaadaan inta wax garadka ah oo dhan, waxaana lagu qaban jirey shirkaas meel biyo leh, wuxuuna socon jirey shirkaasu intii muddo ah amase ay ka dhammaato xeerkaas dejintiisu; haddii ay dhacdo in wax dhamaan waayaanna dib ayaa loo dhigan jirey oo mar kale ayaa laysu soo noqon jirey.

Waxaa dhici jirey in mararka qaarkood loo shiro dane kale oo aan ahayn xeer dejin, sida marka la akhrisanayo diinta ama la Allabaryayo ama ay roob doonayaan, waxaana dhici jirey in ay xeerar ku degsadaan shirarkaas dhexdooda iyagoo fursad ka dhiganaaya ama ka faa'iidaysanaaya kulankaas ay isugu yimaadeen.

Waxaa lagu magacaabi jirey xeerarka magacii ay lahayd meeshii lagu guddoonsaday. Tusaale ahaan haddan wax uga soo qaadano, waxaa la dhihi jirey marka xeer la tilmaamayo: xeerkii Cakaaro, xeerkii Gaddoondhawe, xeerkii Yaaqle iwm. magacyadaasoo ah meelihii lagu shiray markii la dejinayey. Mararka qaarkoodna waxaa dhici jirtey in odayadu isugu yimaadaan iyagoo miyiga ka yimid magaalooyinka ama tuulooyinka, halkaasna ay ku dhammaystaan wixii ka qabyo ahaa ama ay ku dagsadaan xeerar cusub halkaas.

## DHAQAN GALKA XEERKA

Soomaalidii hore, xeer markay guddoonsato, hore ayuu ka dhaqan geli jirey, isla maalinta la dejiyeyba wuxuuna u

dhaqan geli jirey, sidii loo dejiyey, mana jiri jirin cid sare ama madax sare oo laga sugo saxiix ama oggolaasho.

## ILAALINTA XEERKA

Xeerka markii la guddoonsado, wuxuu ahaan jirey mid qof kasta uu ku dadaalo inuusan meel uga dhicin, ama aan lagu helin asaga oo ku xadgudba, sidaas darteedna waxaa dhici jirtey inuu ahaado xeerku mid la ilaaliyo ama aan lagu xadgudbin; inkasta oo xeerku uusan ahayn mid dhigan haddana wuxuu ahaan jirey mid qof kasta uu madaxa ku hayo.

Ciddii ku xadgudubta xeerarka oo ilaalin weyda waxaa lagu qaadi jirey ciqaab, lagamana aqbali jirin hadduu yiraahdo qof: anigu ma ogeyn inuu jiro xeerkaasi.

## GARNAQA IYO CIDDI NAQI JIRTEY

Waxaa garta naqi jirey ragga wax garadka ah oo dhan. Taasi waa marka ay tahay xaajadu curad, hase ahaatee, marka ay tahay xaajo ugub ah waxaa loo geyn jirey odayaal waayo arag ah, xeerkana aad u yaqaanna. Waxaa kale oo dhici jirtay marka ay tahay xaajadu xaajo curad ah, hase ahaatee ay tahay arrin weyn in uusan geli jirin waxgarad oo dhan ee waxaa loo geyn jirey odayada caanka ku ah xeer soomaaliga. Habka garta loo naqi jirey wuxuu ahaan jirey hab aan ka duwanayn habka maanta garta loo naqo oo ay u naqaan maxkamadaha caadiga ah; odayadu marka garta ay naqayaan geed ayey fariisan jireen, ciidda ku fariista aa iyo gogol loo dhigyaa ee ma jiri jirin xafiisyo iyo kuraas lagu fariisan jirey. Hadday tahay habeen, waxay fariisan jireen meel iska bannaan. Meesha garta lagu qaadayo cidna lagama celin jirin ee dadka oo dhan ayey u furraan jirtay, hase ahaatee marka go'aanka la gaarayo, waxaa dhici jirtay in la saaro guddi gaar ah oo aynan cidna u tegi karin, xaalkooduna wuxuu ahaan jirey mid sir ah inta ay ka soo saarayaan go'aankooda.

## HABKII GARTA LOO NAQI JIREY

Waxay lahaan jirtay soomaalidii hore xeer ku saabsan habka garta loo qaado oo aan qornayn, hase ahaatee ahaan jiray mid ay xasuusan yihiin oo madaxa ay ku hayaan, habkaasuna wuxuu ahaa hab la tixgeliyo wuxuuna ahaan jirey sida soo socota: ma jiri jirin wax dacwad qoran ah oo uu keeno dacwooduhu, ninka dacwoonaya geedka la fadhiyo ayuu imaan jirey oo ka soo jeedin jirey hadal dacwo ah, kaddib markuu ogaado in uu joogo ninkii uu dacwada u qabay, wuxuuna ku tifaftiri jirey dacwaddiisa waxa uu sheeganaayo nooca ay yihiin iyo sida looga qaaday iyo waqtiga laga qaaday iyo meesha looga qaaday, wuxuuna marka hore kala caddayn jirey in waxa uu sheeganayo ay yihiin dhiig ama dhaqan; hadday dhiig yihiin wuxuu kaloo caddayn jirey inay qudh yihiin iyo inay qoon yihiin; wuxuu kaloo caddayn jirey inay waxa uu sheeganayo xilo yihiin ama xoolo. Taasi waa haddu marka hore caddeeyo in waxa uu sheeganayo ay yihiin dhaqan.

Wuxuu kaloo caddayn jirey, nooc kastaba ha ahaato dacwaddiisuye, in waxa uu sheeganayo ay yihiin wax mooradiisa ahaa iyo inay ahaayeen wax magan ugu yimid.

Wuxuu tilmaami jirey dacwooduhu inay xaajadu tahay curad ama ay tahay ugub; hadday curad tahayna wuxuu tilmaami jirey wixii laga soo qaadi jirey ayadoo kale hadda ka hor, markay dhacday; wuxuu kaloo sheegi jirey waxa uu ku caddaysanayo gartiisa, waxaasoo ah marag goob joog ahaa amase si kale wax ku ogaaday goobjoogba yayna ahaanine; haddii ninka la dacweynayo uu qirsan yahay inuu sameeyey waxa lagu dacweynayo, ninka dacwoonayaa wuxuu dhihi jirey: «waxaas waa la ii qirsan yahay». Ugu dambaysta wuxuu dacwooduhu dhihi jirey ama ka codsan jirey shirka in la galo gartiisa go'aanna laga gaaro. Halkaas waxaa jiri jirtey in laga warguri jirey ninka markuu hadlayo, waxaana ka war-

guri jirey nin ka mid ah ragga geedka fadhiya, waxaana loo aqoon jirey ninkaas koobiye ama wargure ama halhaye.

Markuu dhammaysto dacwooduhu hadalkiisa, wuxuu oran jirey «waan ka baxay», warguruhuna wuxuu oran jirey «dooddaas waa maqlaysaan ikhyaarta geedka fadhidaay». Ragga geedka fadhiyaa waxay oran jireen «gartaas ka jawaab ninka loo haystoow», dabadeed hadalka waxaa qaadan jirey ninkii la dacweeyey ama wax lagu sheegtay: haddii uu yahay nin wax qirsan, hadalka waa uu soo gaabin jirey, wuxuuna dhihi jirey markuu tilmaamo siday arrintu u dhacday kaddib: «waxaas nalagu sheeganayo ama laygu sheeganayo waa ay jiraan ama waa ay dheceen ee ikhyaarta geedka fadhidaa ha ka taliso oo ha na mariso annaga iyo cidda wax nagu sheeganaysa wixii xeerka soomaaliyeed ahaan jirey». Haddise ninka la dacweeyey uusan qirsanayn waxa lagu dacweynayo hadalku waa dheeraan jirey, wuxuuna mari jiray wixii ninkii hore maray oo dhan, asagoo mid-mid uga jawaabaya, wuxuuna qabsan jirey markhaati haddii uu haysto. Markii uu dhameeyo dacweysanuhu doodiisa dhankastaba hau doodee wuxuu dhihi jirey «waan ka baxay».

Ninkii warguraha ahaa ayaa istaagi jirey, markaas ayuu doodihii ay ku kala hadleen labada nin ama labada dhinac mar labaad isagu ku celin jirey oo ka raaridi jirey ragga geedka isugu yimid ama fadhiya isagoo midba markiisa si caddaan ah oo kooban u sheegaya, wuxuuna ku xiri jirey «doodda murtideedu waa intaas» ee odayada iyo wax garadka geedka fadhiyaa wax ha ka yiraahdeen»».

Haddii loo baahan yahay ama la arko inay meesha ku jirto marag la dhegeysto waa la dhegeysan jirey, labada dhinac mid kasta ha keeno e, kaddibna waxaa la bixin jirey ragga wax garadka ah rag ka mid ah oo iyagu soo gaara go'aan ku saabsan dacwaddaas, kamana badnaan jirin tiradoodu raggaas labixinayo sagaal (9) nin, lagama eegi jirin xagga da'da

ragga la bixinayo ee waxaa laga eegi jirey xagga xaajo aqoonmada, xeer aqoonimada, xilkasnimada, eexasho la'aanta iyo caqli wanaagga.

Bal halkaan aan ku sheegno qisaddii caanka noqotay oo ku timid tan oo kale, waxaana loogu halqabtaa qisadaas nin la oran jirey Xasan Cawl oo soomaali ahaa, noolaana 200 sano ka hor. Xasan Cawl wuxuu ahaa waqtiga qisadaasi dhacday wiil yar oo toban (10) jir ah, wuxuuna yimid geed weyn oo shir lagu hayo, laguna dhegeysanayo laba nin oo doodaysa oo dacwo ay ka dhaxayso; Xasan Cawl geedkii ayuu fuulay, laan sare oo geedka ah ayuu ku fariistay, taasna waxaa ugu wacnaa caruurnimada, maxaa yeelay caruurtu way jeceshahay geedaha fuuliddooda. Xasan Cawl wuxuu dhegeystay dooddii labadii nin; markii ay dhamaatay dooddii, raggii geedka fadhiyey waxay yiraahdeen «arrintaan ha u baxeen ragga waayeelka ah», markaasuu Xasan Cawl yiri: «waayeelka ha bixinina ee waxgaradka baxsha»; markaasaa raggii geedka fadhiyey intay kor u eegeen Xasan Cawl ayey yiraahdeen «war soo dago», markuu soo degey ayaa lagu daray raggii guddiga ahaa oo loo saaray inay soo gooyaan garta, halkaasuna arrintii uga qayb qaatay, ra'yigiisiina ka dhiibtay, waxaana la ogaaday inuu yahay nin waxgarad ah. Sheekadaan waxay ku tusaysaa in soomaalidii hore garta ay u qaadi jirtay si dimoqraadiyad ah isla markaana la tixgelin jirey, marka garta la qaadayo, ninkii wax garad ah ee aan la tixgelin jirin inta waayeelka ah oo keli ah.

Haddaba soomaalidii hore, habkay garta uu qaadi jirtay wuxuu ahaan jiray sida aan soo sheegnay.

Guddiga markii loo diro inay go'aan soo saaraan, guddigaas oo ka mid ah raggii geedka fadhiyey oo dhegeystay garta, tiradooduna aysan ka badanaan jirin sagaal (9) nin, waxaa dhici jirtay in guddigaasi fariisto meel gaar ah ama geed gaar ah, shirkooduna wuxuu ahaan jirey mid ayaga khaas u ah. la-

mana oggolaan jirin inay cidi u tagto, go'aankoodana inta aan lagu dhawaaqin ama la sheegin ka hor wuxuu ahaan jiray mid sir ah, go'aanka markay gaaraanna waxay ku soo noqon jireen geedkii shirka.

## KU DHAWAAQIDDA XUKUNKA

Markii guddigii ku soo noqdo geedkii shirweynaha oo iyaga hore u bixiyey ama u magacaabay oo u diray inay go'-aan ka soo saaraan gartaas, waxay sheegi jireen go'aankooda, waxana ku dhawaaqi jiray nin ka mid ah guddiga, wuxuuna sheegi jirey ama tilmaami jirey isagoo si caddaan ah u tifafti-raya asbaabta ay u cuskadeen go'aankooda iyo xeerka ay waa-fajiyeen. Shirweynaha ninka u da'weyn ama ugu madaxsan ragga shirka fadhiya ayaa wuxuu dhihi jirey «waan guddoo-minay gartaas ee labada dhinac raalli ha ku noqdeen». Gud-digaas garta u gooyey ama soo goyn jirey marka la bixinayo labada dhinac ee dacwaddu ka dhaxayso mid kastaa wuxuu ka reebi jirey guddiga ama codsan jirey in laga reebo ninkii uu ka baqayo inuu ka eexdo asagoo sheegaya sababta uu uga baqayo, waana laga oggolaan jirey.

## RAFCAAN QAADASHADII HORE

Markii go'aanku dhaco, haddii ay ku noqon waayaan labada dhinac raalli, ama midkood raalli ku noqon waayo, rafcaan ayuu qaadan jirey, wuxuuna oran jirey «gartaas waan celiyey, waxaana ka tagahayaa geed labaad».

Markii ay tagaan geedka labaad waxaa la dhegeysan ji-rey doodda rafcaanlaha iyo rafcaansahanaha, waxayna ku cad-dayn jireen dooddooda sababta ay ugu hoggaan sami waayeen ama uu ugu hoggaan sami waayey ninkii diiday go'aankii ho-re, waxaana loo qaadi jirey dacwadda habkii tii hore loo qaa-day oo kale, waxaana la baari jirey go'aankii geedkii hore iyo waxyaalihii uu cuskaday.

Markii go'aanka labaad soo baxo, hadday ku raalli noqon waayaan ama uu ku raalli noqon waayo labada dhinac midkood, geed saddexaad ayaa laysla tegi jirey, go'aanka kama dambaysta ah ayaana ka soo bixi jirey geedkaas saddexaad.

Ninkii ku qanci waaya go'aanka ka soo baxa geedka saddexaad ciduna warkiisa ma dhegeysan jirin haddii ay is raaceen saddexdii geedba, hase yeeshee, haddii go'aannadu ayna is wada raacin ee qaarba meel maray, waa la dhegeysan jiray cabashada ninka samri waayey, dib ayaana loo eegi jiray arrintii mar afraad ayadoo hoos laga soo bilaabayo.

## MUDDADA RAFCAANKA

Rafcaanka waxaa lagu qaadan jiray muddo aan ka badnayn maalin qura, maxaa yeelay, labada dhinac markii la maqashiiyo go'aanka, kii raalli ku noqon waaya wuxuu ku dhawaaqi jirey isla markiiba inuu rafcaan qaatay, hadday labada dhinac raalli ku noqdaanna, waxay dhihi jireen «raalli ayaan ku nahay xukunkaas» horay ayeyna ka fulin jireen.

## JOOGIDDA DHINACYADA MARKA LAGU DHAWAAQAYO XUKUNKA

Labada dhinac marka dacwadda la qaadayo waxaa waajib ahaan jirtay inay joogaan labaduba, ama wakiilladoodu joogaan, ma dhici jirin in la qaado nin maqan dacwadiis oo aynan ciduna wakiil ka ahayn, marka xukunka lagu dhawaaqayo in labada dhinac maqlayaanna waajib ayey ahaan jirtay ayaduna maxaa yeelay waxaa laga dooni jirey inay maqashiiyaan shirka «waan qaadanay gartaas ama rafcaan baan ka qaadanay».

## FULINTA XUKUNKA

Xukunka waxaa lagu fulin jirey laba arrimood midkood:

1) Si raallinimo ah: taas oo ah in ninkii wax lagu xukumay uu jid qaato oo uu iska muquuniyo wixii lagu xukumay asagoo gacanta ka saaraya ciddii loogu xukumay.

2) Si xoog ah in lagu fuliyo, taasna waxay ahaan jirtay in loo diro ninka wax lagu xukumay rag xigtadiisa ah oo xoog leh, ayaga ayaana ka soo qaadi jirey wixii lagu xukumay, xeel iyo xoog midkoodba ha uga soo qaadeene.

## XUKUNKA SHARCIGA ISLAAMKA IYO SOOMAALIDII HORE

Dadka soomaalida ah oo ahaa dad islaam ah waligiiba, wuxuu meela badan kaga dhaqmi jirey shareecada Islaamka. Guddiyadii garta loo saari jirey ama geedihii garta lagu naqi jirey oo la isugu imaan jirey haddii ay ogaadaan in gartu ay tahay mid aan la geli karin in sharciga Islaamka lagu xukumo mooyaane, waxaa loo geyn jirey gartaas culumada soomaaliyeed oo aqoonta dheer u lahayd shareecada Islaamka ayaga ayaana dhammayn jirey gartaas ayaga oo cuskanaya shareecada Islaamka. Tuaasle ahaan: markii arrintu tahay ama garta laysku hayo ay tahay ninkaax ama furid ama dhaxal iyo waxyaalaha la midka ah, waxaa geli jirey gartaas culimada soomaaliyeed oo aqoonta dheer u leh shareecada islaamka, mana aysan dhexgeli jirin odayadii naqi jirey garta ku saabsan xeer soomaaliga.

Waxaa kale oo jirtay in ay dhacday, meelo aan dabnayn oo ka mid ah dalka soomaaliyeed, in lagu fuliyey qisaas oo ah qofkii qof kale dilay oo la dilay iyo gacan goyn tuugo, waxaana ka mid ahaa meelaha ay ka dhacday gacan goyntu gobolka Bari, waxayna ahayd qarniyadii dambe dhexdooda; qisaastuna waxay ka dhacday meelo kala duwan oo dalka ka mid ah, hase ahaatee dadka la qisaasay, haddii laysu wada geeyo ka-

ma badna labaatan (20) ruux ama maba gaarahayaan labaatanka. Meelaha lagu xukumi jirey waxaa abbaanduule ka ahaan jirey culimadii soomaaliyeed oo diinta aqoonta dheer u lahayd. Waxaa kaloo jiri jirtay in mararka qaarkood, laba nin oo gari ka dhaxayso midkood iska soo taagi jirey xeer soomaaliga oo uu weydiisan jirey in wax loogu qaybiyo shareecada islaamka, waxaana loo diri jirey geedka culimada, culimada ayaana kala saari jirtay.

Marka la isugu yimaado shirarka waaweyn waxaa la fariisan jirey geedaha hoostooda, waxaana loo kala fariisan jirey si nidaam ah, waxayna ahayd in culimadu geed fariisato, ugaasyada iyo duqowduna geed fariistaan, ragga akhyaarta oo kalana geed fariistaan, dhallinyaraduna geed fariisato.

Intaas oo geed ah mid walba waxaa looga hadli jirey dano caam ah iyo kuwo khaas ah. Waxaa kaloo ayaguna shirarkaas gooni u fariisan jirey dumarka oo aan tixgelis weyn la siin jirin, xagga garnaqa marka la eego.

Waxaa kaloo jirtay in soomaalidii hore gar alla gartii la arko oo la bixin waayo loo diri jirey culumada shareecada islaamka, iyaga ayaana kala saari jirey arrimaha xeer soomaaliga lagu dhammayn waayo, nafsaddoodana waa lagala tashan jirey garta xeerka si ay uga ilaaliyaan wixii gef ku ah diinta Islaamka.

Rafcaanka laga qaato xukunkaas shareecada Islaamka lagu xukumay waxaa loo qaadan jirey nin kale oo culumo ah oo aan ahayn kii horey u xukumay, haddu raalli ku noqon waayo kaas labaadna rafcaan saddexaad ayaa u furnaa.

## SOOMAALIDII HORE IYO XEERKA DHIIGA

Xeerka dhiigga ama dhiigguba wuxuu u qaybsami jirey, sidaan hore u soo sheegnay Qur iyo Qoon. Hadduu qur ya-

hay oo qofkiiba dhinto waxaa la qaadan jirey diyo taasoo ahaan jirtay boqol halaad nin hadduu yahay, naag hadday tahayna (50) halaad. Waxaa dhici jirtay markii ruux la dilo, haddaynan ahayn laba qolo oo iska hor yimid ee ay tahay laba ruux oo is dilay, waxay imaan jireen qoladii ninkoodu wax dilay iyagoo wada mara karfan ah iyo hal duug ah iyo hal xaal ah ama sabeen, qoloba siday u taqaan, waxayna weydiisan jireen qoladii ruuxa laga dilay inay heshiis ka oggolaadaan. halkaas ayaana lagu heshiin jiray in diyo la kala qaato isla maalintaas ama maalinta ka dambaysana. Waxaa la siin jirey qoladii ruuxa laga dilay labaatan (20) halaad oo lagu magacaabi jirey **Rafiso** oo diyadii ka mid ah hadduu yahay ruuxa la dilay nin, hadday naag tahayna rafisadu toban (10) halaad bay ahaan jirtay. Meeshaas waxaa lagu qabsan jiray muddadii lagu kala qaadan lahaa magta inteedii kale, iyo sidii loo kala qaadan lahaa.

Hadduu dhiiggu Qoon yahay waxaa dhici jirtay in ruuxa qoontu ku dhacday marka hore la **xaraariyo** ama la daweeyo haddana la baanto; markuu biskoodo kaddib ayaa waxaa la siin jirey magdhawgiisii, waxaana ruuxaas marka hore daweyn jiray baananna jirtay ciddii dhibka gaarsiiyay, ilaa uu ka bugsoodana ayaga ayaa gacanta ku hayn jirey, waxaana wax lagu siin jiray laba xaalo midkood: sharciga islaamka hadduu diido xeer soomaaliga asagu, iyo xeer ay horay u u dhigteen labada qolo oo ay ka kala dhasheen, hadduu jiro xeerkaasuna khasab ayey ahaan jirtay in la raaco. Hadday tahay xaajadaas mid ugub oo aan horay loo arag, taasoo ah in dhaawac qofka meel xun uga dhacay, ama si xun ugu dhacay, waxaa la yeeli jiray ama lagu dhaqaaqi jirey sidii xeer cusub loogu dejin lahaa, waxaana loo samayn jiray xeer cusub, oo hadda kaddib markii ay timaaddo iyadoo kale lagu qaado. Hadday xaajadu tahay qoonta ah mid horay xeer looga lahaa laguma dhibtoon jirin wax kala qaadashadeeda ee waxaa la marin jirey xeerkeedii.

## QADAFKA IYO XEERKII LAGA LAHAAN JIREY

Soomaalidii hore qadaf waxay dhihi jireen wixii fool xun oo aan ahayn dil iyo dhaawac, wuxuuna raacsanaan jiray qadafku qaybta dhiigga markii loo kala qaybsho xeer soomaaligii hore dhiig iyo dhaqan.

Haddaba waxaa ka mid ahaa waxyaabihii soomaalidu qadafka oran jirtay: aflagaaddada, dharbaaxada, jeedalka, kabta, haraatida, jifada waranka ama takiga qoloba siday u taqaan iwm. Waxayna u yaqaaneen soomaalidii hore waxyaabaha aan soo sheegnay oo dhan waxyaabo sharafta bani-aadanka dhaawaca, waxaana loo yaqaanay ninkii waxaas lagu sameeyo nin sharaftiisa meel looga dhacay, waxayna ahaan jirtay xaajo waad loo dhibsado, haddii aan si degdeg ah looga hortaginna waxaa ka imaan jiray dagaal iyo dil, sidaas darteedna, markii ay maqlaan dadka wax garadka ah nin lagu sameeyey waxyaabahaas aan soo sheegnay oo aan ka dagaallamin isla markiiba ama aan u geysan qofkii ku sameeyey wax looga samri karo waxaas lagu sameeyey, si degdeg ah ayey u gurman jireen, waxaana la qaadi jirey gar, gartaasna waxay ahaan jirtay mid ah **jilib carro**, waxayna ahaan jireen waxyaalahaas qadafka ahi kuwa ka qaalsan ama ka magdhaw badan dhaawacyada waaweyn, waxa xeerku ahaan jiray in lagu baxsho ama la siiyo ruuxa qadafka loo geystay wax ka weyn waxa la siiyo qofka qoonta loo gaystay. Waxa laga yaabaa in degmo walba wax gaar ah ka dhigi jirtay sababtoo ah degmo walba waxay bixin jirtay ama u kala qaadan jirtay qadafka wixii ugu qaali badan hantida ay dhaqato, sidaas darteedna degmooyinka qaarkood ama gobollada qaarkood ma aysan dhaqan jirin fardaha oo ahaan jirey kuwa ugu qiima badan ama ugu sharaf badan xoolaha soomaalidu ay dhaqato; waxaa kaloo laga yaabaa in beeraleydu aysan lahayn ama aysan dhaqan jirin geela oo isagu ahaa kan ku xiga fardaha xagga qaalinimada; sidaas darteed qolo walba waxay magdhaw u siin jireen ninkii la qadfo wixii ugu qaal badan waxa ay dhaqato.

Waxaa ugu waaweynaa waxyaalihii laysku xaal marin jiray in la siiyo ninka la qadfay gabar uu guursado, taasoo macnaheedu yahay in sharaftiisii loo soo celiyey, waxaana ka dhalan jirtay meeshaas fayoobi, heshiis, is aamin iyo xiditinimo.

Mararka qaarkoodna waxaa la siin jirey ninka la qadfay neef fardo ah oo wanaagsan, meelaha qaarkoodna waxaa shardi ahayd inuusan ka yarayn qiimaha neefkaas fardaha ah shan geel ah, ama waxaa la siin jirey ninka la qadfay geel ay u yartahay shan dhadig oo affar jira ah.

Waxaa dhici jirtay marar badan in la isugu daro ninka la qadfay xilo iyo xoolo si loo raalli geliyo, taasina waxay u badnaan jirtay marka ninka la qadfay uu yahay nin madax ah ama magac dheer leh ama culumo ah.

**Maraado:**

Maraado waxaa la dhihi jirey xoolo ciqaab ah oo ka dhiganaan jiray ganaaxa maanta ah, waxaana lagu samayn jiray ama lagu ciqaabi jirey ruuxii sameeya qadafyadii aan soo sheegnay asaga oo ku sameeyey nin qaraabadiisa ah ama madaxdiisa ah ama xaaskiisa.

Maraadadu waxay ahaan jirtay in laga qawraco ninkaas la ciqaabayo oo qadafka sameeyey neef geel ah ama lo' ah oo ka mid ah kuwa uu xoolihiisa ugu jecel yahay ama ah kan xoolihiisa ugu weyn, asaga ayaana la dhihi jirey «soo qabo neefka», markuu soo qabtana waxaa la dhihi jirey «adigu gacaantaada ku gawrac», waxaana u qaban jirey inta uu neefka gawracayo ninkii uu qadfay ama nin uu wakiishay, markii uu gawracana waa la qalan jiray, hilbihiisa ayaana la cuni jirey, halkaas ayaana lagu fiyoobaan jiray. Haddii ninka wax qadfay uu diido inuu neefka gacantiisa ku gawraco, waxaa loo qaadan jirey inuusan doonayn heshiis. Haddii ninka

wax la yeelay uu neefka qaban waayo marka la gawracayo ama nin wakiilan diido, waxaa asna loo qaadan jiray inuusan doonayn heshiis, hase ahaatee waxay ku dadaali jireen odayadii hore in ay meeshaas ka dhaliyaan fiyoobi waana ay ka dhalin jireen.

## BAAJINTA MARAADADA

Maraadada waxaa baajin jirey ama awood u lahaa inuu baajiyo oo uu iska daayo ninka la qadfay, waxaana dhici jirtay mararka qaarkood inuu, marka neefka la soo qabto oo gawriciisa mindida loo qaato, ninka la qadfay dhihi ijrey «waa fiyoobaadaye ha la sii daayo neefka» waana la sii dayn jirey, waxaana ka muuqan jirtay meeshaas in uu fiyoobaaday ninkii la qadfay isla markaana uu u naxariistay ama naxariis u gashay ninkii asaga qadfay, taasaana ka qurux badnaan jirtay in la gawraco neefka. Arrintaas sidaan u soo sheegnay waxaa la dhihi jirey **Maraado** waxayna ku saabsanaan jirtay qadafkii ka dhexdhaca labada qaraabada ah ama isu madaxda ah ama saaxiibka ah, ama haddii la qadfo haweenayda la qabo.

## X A A L

Xaal waxaa la yiraahdaa xoolaha la siin jirey dadka xumaatada loo geystay, xumaatadaas oo ah qadafkii aan ka soo sheekaynay, af ahaayaa qadafkaasi iyo adin ahaayaaba. Waxaa kaloo la dhihi jirey xaal gabadhii la siiyo nin la qadfay, waxaana la dhihi jirey ninkaas gabadha markii la siinaayo «gabar xaal ah ayaa lagu siiyey» amase «waxaa xaal laguu siiyey gabadhii heblo hebel ahayd» halkaas ayuuna ku fiyoobaan jiray.

## XEERKA TUUGADA LAGA LAHAAN JIREY

Soomaalidii hore tuugada waxay ku tirin jirtay qoonta, waxayna raacsanaan jirtay dhiigga maxaa yeelay waxaa wee-

ye dhibaato loo geystay ninka maalkiisa amase waxaaba la dhihi karaa dhaawac loo geystay weeye ninka xoolihiisa, sidaas awgeed ayey ku tirsanayd qaybta dhiigga markii xeerka loo qaybsho dhiig iyo dhaqan, taasoo ah sidii ay u qaybin jirtay soomaalidii hore, xeerka tuugadu wuxuu ahaan jirey mid aad loo adkeeyo, si naxariis la'aan ah ayaa magdhawga looga qaadan jirey ninkii wax xada. Wax ciqaab la yiraahdo oo kale ma jiri jirin, hase yeeshee waxaa laga sheegay gobolkaas Bari oo magaala madaxdiisu tahay Boosaaso in dad wax xaday gacmaha laga gooyey iyadoo la raacaayo shareecada Islaamka hase yeeshee ma ahayn wax hore u maray.

Magdhawga tuugada wuxuu ahaan jirey meesha ugu yar ama ugu magdhaw yar saddex jeer laab, meesha ugu magdhaw badanna toddoba jeer laab, taasoo macnaheedu yahay in ninka wax xada laga qaadi jirey ama laga magdhaban jirey saddex laabkood ama toddoba jeer laabkood ama inta u dhaxaysaa lalamana bixin jirin ninka wax xaday wixii uu xaday magdhawgooda. Hadduu kaalmo u doonto qaraabadiisa lama kaalmayn jirin, waxaana la dhihi jirey «gaws tuug iyo gus macsiyo midna xeer uma lihin», taasoo hal qabsi ahaan jirtay amase maahmaah ahaan jirtay. — Gus macsiyo — waxaa laga wadaa ninkii naag kufsada ama dabagura, asagana lalama bixin jirin magdhawga wixii uu geysto.

Ninka tuugga ah oo wax xada, haddii lagu soo qabto wixii uu xaday oo ay ku soo qabtaan ciddii uu ka xaday gacmaha ayey ka soo xiri jireen, waxayna ku soo xiri jireen xarig, hadday arkaan dadkii uu ka dhashayna asagoo sidaas u xiran, dagaal uguma hiillin jirin ama kama dagaallami jirin arrintaas, hase ahaatee qaraabadii iyo dadkii uu ka dhashay oo arkaaba waxay u soo jeedin jireen cidda uu wax ka xaday maslaxo maslaxadaas oo ah inay ka qaataan ninka wax xaday magdhawgii xeerka ahaa, xariggana ay ka furaan, ninka tuugga ahna wuxuu ahaan jirey nin ceebaysan ama ka cambaaraysan dadka uu la nool yahay dhexdiisa, tuugaduna waxay aha-

an jirtay wax dhif iyo naadir ku ahaan jirey dalka soomaalida, waxayna ahaan jirtay wax dhawrkii sanaba mar la sheego nin wax xaday. Waxay soomaalidii hore u adkayn jirtay magdhawga tuugada waxay ahayd in la hor istaago tuugada dhiciddeeda.

## HILBA QALASHO AMA HANTI HUR

Soomaalidii hore waxay lahayd wax tuugada u dhawaa asi aan ahayn tuugo waxaana la dhihi jirey **Hilbo qalasho** ama hanti hur, taasina waxay ahayd in nin gaajaysan xaaskii iyo caruurtiina ka gaajoodeen wax uu cunana waayey ama uu siiyo xaaska iyo caruurta, uu hilbo ka qasho xoolo dad kale leeyahay amase uu rarto badar nin kale leeyahay, ama ka kaxaysto irmaan xoolo nin kale leeyahay, waxyaalahaas oo dhanna ayna ogsoonayn dadkii lahaa marka uu samaynayo, hase yeeshee —waa inuu u soo sheegaa dadkii, uu ka qaatay maalkaas si aysan meela kale uga doondoonin, waxayna u badanaan jirtay arrintu in dadka uu ninkaas ka hilbo qasho ama u qaato waxooda si hanti hur ah ay yihiin qaraabadiis ama saaxiibadiis ama dad uu aqoon dheer u leeyahay. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xeerku wuxuu ahaan jiray in aan wax la yeelin ama aan laga aargoosan ninkaas ay dhibaatadu u geysay inuu qasho ama ku hanti huro xoolo dad kale leeyihiin; welibana xeerku wuxuu ahaan jirey inaan ninkaas lala hadlin, magdhawna la weydiisan inta uu ka baxayo dhibaatadaas haysata asaga, xaaskiisa iyo caruurtiisa. Markii uu dhibaatada ka baxo oo ay nolol fiican gaaraan isaga iyo caruurtiisu ayaa si naxariis leh looga magan jirey wixii uu qashay ama hanti huray oo aan ahayn wixii uu irmaan u kaxaystay ama gaadiid u kaxaystay ama uu qoorsi u kaxaystay, asagaana kuwaas iska soo celin jirey markii uu ka dhamaysto muraadkii uu ka lahaa.

Soomaalidu waxay xeerkaas u degsatay bani-aadaminimada tixgelinteeda iyo sidii bani-aadanku dhibaato usan uga gelin xagga nolosha. Waxaa kaloo xeerkaasi ku tusayaa in soo-

maalidu lahaan jirtay wax wada cun kuna socon jirtay hab hantiwadaag.

Arrintaas soomaalidu waxay u kala qaybin jirtay ama kala siin jirtay laba magac; magaca koowaad waxaa la dhihi jiray **hilba qalasho** waana markii ninku qasho xoolo nool; magaca labaadna waxay soomaalidu oran jirtay **hanti hur** waana markii ninku qaato nacfi kale, kaasoo la dhihi jirey «ninkii hebel ahaa wuxuu ka hilbo qashay xoolihii hebel» ama «ninkii hebel ahaa wuxuu hanti hur u qaatay wixii hebel».

Hilba qalashada iyo hanti hurka waxay ka tirsanaan jireen qaybta dhaqanka ee ma raacsanayn qaybta dhiigga, taasi waa markii aan u qaybino xeer soomaaligii hore: dhiig iyo dhaqan.

## XEER GABADHA LA KUFSADO

Soomaalidii hore kufsad waxay oran jirtay hablaha la xoogo amase ninkii inta la kulma naag meel cidla ah joogta ama maraysa xoog uga qaada tacabkeedii markuu qaawiyo kaddib. Xeerka kufsashadu wuxuu ahaan jiray mid aad u adag, wax naxariis ahna looma geli jirin ninkii lagu helo kufsadkaas, waxaana laga qaadi jirey toban halaad oo geel ah hadday tahay naagta la kufsaday naag inan ah oo aan weli la guursan, haddayse tahay naagta la kufsaday naag garoob ah ama nin qabo, waxaa laga qaadi jirey ninkii kufsaday shan halaad oo geel ah. Geelaas laga qaadi jirey ninkii wax kufsaday ciduna lama bixin jirin ee asaga keligiis ayaa laga qaadi jirey, haddii uusan lahayn xoolo intaas gaarana, waxaa laga qaadi jiray ama laga qaadan jiray wax alla wixii laga helo waxay le'ekaadaanba. Wuxuu ahaan jiray ninka wax kufsaday ama ninkii naag kufsada nin dhagar qaba ah oo ku fadeexaysan ummadda dhexdooda; waa uu ka carari jiray gobolkaas uu wax ka kufsaday wuxuuna aadi jirey gobollo kale. Dumarka oo laga oohiyo ama loo geysto wax aan kufsad ahayn wuxuu ahaan jiray mid ku

dhaw kan kufsashada, waxaana la bixin jiray ama uu bixin jiray ninka geystay waxaas xaal iyo xoolo kale oo qiimahoodii aysan ka yarayn neef geel ah, hase ahaatee ninka waxaas geystay kama carari jirin carrada ee wuxuu ka mid ahaan jiray dadkiisa kaddib markii laga heshiiyo dhibkii uu gaystay. Waxa sidaas loogu adkeeyey xeerka kufsashada waxay ahayd laba arrimood: midka hore in uusan dhicin kufsadku oo nin kasta ha ka digtoonaado. Midda labaad waxay ahayd in uusan dhicin dagaal ama ayna ka dhalanin colaad kufsadku markuu dhaco oo aysan isku baabi'in laba dadyow.

Kufsadku wuxuu raacsanaan jirey qaybta dhiigga ee ma raacsanaan jirin qaybta dhaqanka; taasu waa markii aan u qaybino xeerkii hore ee soomaalida dhiig iyo dhaqan.

Soomaalidii hore kufsadku agteeda wuxuu ka ahaa wax aan la arkin aanana la maqlin muddo badan ama tobankii sanaba meelba laga maqli jirey. Waxaa gobollada qaarkood ka dhacday go'aanno lagu xukumay rag gabdho kufsaday, gabdhuhuna inamo aan rag lahayn ahaayeen, inay guursadaan gabdhihii ay kufsadeen, taasina waa markii laga qaaday wixii xeerku ahaa oo ah magdhawgii, raggiina waa aqbalay arrintaas oo way guursadeen gabdhihii.

## XEER ERGO

Soomaalidii hore waxay lahaan jirtay xeer adag oo ku saabsanaan jirey ergada, ergana waxaa la dhihi jirey rag ka dhex shaqeeya qoladooda iyo qolo kale oo colaadi dhexmartay si ay uga dhex dhaliyaan nabad, waxayna ahaan jireen nimankaasi niman xil kasyo ah oo la xulay dhan kastaba ha ahaatee, xagga caqliga, xagga dabciga, xagga dulqaadka iyo xagga aftahamada intaba. Haddii la heli karana waxaa laga dhigi jirey rag culuma ah oo diinta Islaamka aqoon gaar ahaaneed u leh. Raggaas shaqadoodu waxay ahaan jirtay inay u tagaan cidihii ay colka ahaayeen oo ay is dili jireen, wax

hub ah ayagoon wadan, waxayna abaari jireen raggooda samatalisyada ah iyo ragga wax garadka ah waxayna u sheegi jireen marka u horraysa inay yihiin ergo ka socota ama ka timid cidihii colaaddu kala dhaxaysay, waxay kaloo u sheegi jireen waxa ay doonahayaan oo ka mid ah samaanta, ha ahaato nabad lagu heshiiyo ama ha ahaato xoolihii layska dhacay oo laysu celiyo, ama ha ahaato dad la kala qabsaday oo laysu siidaayo. Ergadaasi waxay ahaan jireen dad col la ah oo hub haysta iyadoo iyagu wax hub ah wadanin, waxayna yeelo ergada, col kasta oo loo qabo. Ergada lafteedu amdhexmari jireen dad aan jeclayn araggooda, aad iyo aadna u neceb.

Ergada waxaa lagu garan jirey inay ergo yihiin qalab la'aantooda ayna wadanin wax qalab ah oo dagaal lagu geli karo, iyo da'dooda ay yihiin rag waaweyn oo isugu jira ciroole iyo gar madaw. Dhallinyarada waa laga reebi jirey ergada. Ergadu waxay la kulmi jirtay dhibaato farabadan oo ah, gaajo, harraad, qorax, qabow iyo cay, caydaas oo uga timaadda dadka aan xilkaska ahayn ama caruurta iyo dumarka; kuwaas oo ka mid ah dadka ay dhexmarayaan oo colaaddu kala dhaxayso, mana ayan heli jirin cid wax siisa oo aan ahayn dadka waxgaradka ah ama iyagaamba ku leexan jirin cid aan waxgarad ahayn. Sidaas darteed ayey la kulmi jireen dhibaatadaas faraha badan.

Soomaalidii hore waxay dhihi jirtay «ergo waxaa loo dirsadaa nin cay dhurwaa uga adag oo kudkude gaajo uga adag, oo kurtun qorrax uga adag oo dhagax qabaw uga adag».

Haddaba soomaalidii hore waxay lahaan jirtay xeer ku saabsan ergadaas, mana bannaanayn in la dilo ama wax la yeelo ergada, col kastat oo loo qabo. Ergada lafteedu ammaan bay ahaan jirtay, kamana ayan baqi jirin in la dilo ama la dhaawaco, waxayna dugsan jirtay xeerka ergada oo soomaalida oo dhan ka dhexeeyey, inta ay la joogaan dadka wax garadka ahna kama ayanbiqi jirin gaajo iyo dhibaato kale midna.

Arrimaha ergadu u socoto waxy ahaan jireen badanaa kuwa heshiis laga gaaro muddo kasta ha ku qaadatee, waxay-na soo noqon jireen iyagoo ku soo guuleystay danahoodii, wa-xaana dhici jirtay in dhinaca kalana soo diraan erog, markii ay soo noqdaan ergadii u tagtay iyaga.

Haddaba maxaa dhici jiray haddii la arko ergo la dilay?

Taariikhda soomaaliyeed odayada facaadiyey ama facaa-din jiray ma aysan sheegin ergo la laayay oo aan ahayn mar keliya, markaas keliyahaana lagu sheegay taariikhda soomaa-lida ergo la laayey, waxaana laayey dad aan xilkaas ahayn una carayasnaa dhinaca ay ka timid ergadu waxayna ahayd deg-mada Laascaanood sanadkii 1954 waxaana ka siyaaday co-laad iyo dagaal, nimankii laayeyna waxaa cambaareeyey ama ceebeeyey ama colaad u qaaday soomaalidii maqashay oo dhan, carradii ayeyna ceeb la mariwaayeen qoladii lagu dhexdilay ergadaas.

Sidaas ayaa ergadu u lahayd xeer adag mana dhici jirin in la dilo. Maahmaah kale oo ergada ku saabsan waxay ahayd «ergo wixii la faray geysaa wixii la siiyana way cuntaa», taasi waxay na tusaysaa in xeerku ahaa in ergada lafteedu ayna sa-mayn jirin wax tacaddi ah ama dhaqdhaqaaq kale iyo hadallo ka caraysiiya dadka ay dhex joogaan. Mararka qaarkood wa-xaa dhici jirey in ergadu ahaato rag aan ahayn labada dhinac oo colaaddu ka dhaxayso midna, taasina, waxay imaan jirtay marka labada dhinac oo colaaddu ka dhaxayso uu gaaro col-koodu meel foolxun oo ay isu haystaan hubka ama ay isla dha-cahayaan waranka, markaasna ay suuro gal ahaan weydo inay ergo isu diraan; hase ahaatee qolo saddexaad ayaa u soo diri jirtay ergo dhexdhexaadisa. Haddaba ergada ka timaadda qolada saddexaad laftoodu waxay ahaan jireen rag la soo xu-lay, waxayna la kulmi jireen dhibaatooyin ka yar kuwii ay la kulmi jireen ergadii kasocon jirtay labada dhinac oo is haysa midkood.

Waxaa kaloo jiri jirey mararka qaarkood in laga dhigi jirey ergada rag ka dhexeeya ama ka kooban labada dhinac oo is haysata, taasina waxay ahaan jirtey markii ay colaaddu sahlan tahay oo ay ku siman tahay xoolo yaryar oo la kala qaaday ama dhaawacyo yaryar oo lays gaarsiiyey ama dad kama' (1) laysaga laayey.

Arrintu si kastaba ha ahaatee ergada xeerkeedu isku mid ayuu ahaan jirey, aad baana loo adkayn jiray loona ilaalin jirey, ergaduna waxay ahaan jireen kuwa ka dhaliya nabadgelyo dalka, colaaddana baabi'iya.

## RAACDO IYO XEERKEEDII

Raacdo waxaa la dhihi jirey dadka ka daba taga ama raadqaada xoolo laga xaday ama laga qaaday oo lala aaday degmo kale, ragga ka qaadayna aysan ka dhaxaynin wax colaad ah oo hore waxa ka qaadayna ay yihiin dad aan xilkas ahayn ama doonaya in colaad ka dhex dhaliyaan labada dhinac ama labada degmo.

Soomaalidu xeer bay ka lahaan jirtay raacdadaas wuxuuna ahaan jirey xeerkaasu in dadkaas raacdada ah lala gurmado; gaar ahaanna degmadii xoolaha lala soo galay waxay la baadi goobi jireen ciddii xoolaha soo qaaday waxayna la qaadi jireen raadkii xoolaha ama dadkii soo qaaday; ciddii uu galo raadkaasi, waxaa lagu dhihi jiray amase wuxuuba xeerku ahaan jiray inay iska bixiyaan raadkaas oo ay tilmaamaan meesha uu galay ama ay sheegaan ciddii wadatay xoolahaas amase inay bixiyaan xoolihii laftoodii oo ay siiyaan nimankii lahaa. Waxaa xeerku ahaan jirey in la siiyo nimankaas raacdada ah wax alla wixii kaalmo ah oo ay ku heli karaan ama suurta gelinaya inay helaan xoolihii ay raadaynayeen oo laga soo qaaday.

---

(1) Kama' waa waxaan loo kasayn marka la samaynaayo.

## QAYBTII DHAQANKA EE XEER SOOMAALIGII HORE

Waxaan hore uga soo sheekaynay amase waxay ku saabsanayd qaybtii hore xeer guud iyo xeer gaar iyo qaybtii dhiigga ee xeer soomaaligii hore. Markii aan u qaybino xeer soomaaligii hore dhiig iyo dhaqan, dhiigguna uu u sii qaybsamaayey Qur iyo Qoon iyo wixii la xiriira qoonta oo ah qadaf, waxaan ka soo sheekaynay waxaas oo dhan iyo wixii raacayey ama soo dhexgalaayey oo ay ugu dambaysay ergadu, haddana waxaan geleynaa ama ka bilawday halkaan qaybtii dhaqanka oo u kala baxaysa xilo iyo : xoolo, waxaana ugu horaysiinaynaa xeerkii xilaha.

### XEER GUUR

Xeerka guurku wuxuu u kala geddisnaan jirey hababka ay degmooyinku u kala geddsisnaan jireen, hababkaas oo ahaa in degmooyinka qaarkood ay ahaayeen beeraley, degmooyinka qaarkoodna ahaayeen xoolo dhaqato nooc kasta xoolahaasi ha ahaadeene.

Guurka arrimaha ku saabsan waxay u kala bixi jireen caado iyo xeer. Waxyaalaha caadada ah waxaa ka mid ahaan jirey habka doonista, habka la bixidda iyo arooska, dumaasha, xigsiisanka iyo iwm. waxaana looga hadlay oo aad kuwaas ka raadisaa buugga la yiraahdo magaciisa «**Habka Guurka, Shalay iyo Maanta**» oo qoreen Axmed Sheekh Cali iyo Khaliif Muuse. Waxyaalaha xeerka ahaan jirayna waxaa ka mid ahaa, sida loo kala qaadan jirey yaradka iyo sida laysugu celin jiray iyo haddii ninka naagtu ka dhimato, ciddii ay ka dhalatayna aysan gabar u joogin xiskiinsan loo siiyo wixii laga yeeli jirey xoolihii yaradka looga qaatay, iyo wixii laga yeeli jiray ninkii laga guursado naag uu doonay oo uu xoolo ka bixiyey, amase naag xiskiinsan ugu joogtay, ama naag uu dumaal u lahaa haddii cid kale ka guursato iyo wixii laga yeeli jirey naagtii diidda ninka. Waxaan halkaan uga

hadlaynaa annagoo mid mid u sheegayna xeerkii laga lahaan jirey waxyaalahaas oo dhan.

## XEER XIGSIISAN

Xigsiisan waxaa la yiraahdaa ama la dhihi jirey ninkii guursada naag la dhalatay ama qaraabo la ah naagtii ka dhimatay, iyadoo ula jeedadu tahay ama ay ahaan jirtay in naagtaasi ay hooyo u noqoto caruurtii ay ka dhimatay walaasheed ama eedadeed amase ulajeedadu tahay in aysan baabi'in xiditinimadii ka dhaxaysay labada reerood, haddaba waxaa dhici jirtay markii nin ay ka dhimato naagtii uu qabay, caruur uga tagtaa iyo ugama teginaaba, in ciddii ay ka dhalatay ay siin jireen gabadh, gabadhaasi ahaatayaa mid yar ama mid weyn farqi ma kala lahaan jirin, hadbase waxaa la siin jiray gabadha reerka lagu arko, haddii gabdha badan reerku leeyahayna waxaa la siin jirey middii u qalanta, hase ahaatee haddii loo waayo gabadh, taasoo macnaheedu yahay in reerku uusan gabadh lahayn waxaa la siin jirey ninka naagtu ka dhimatay xoolihii uu yaradka u bixiyey wixii ka nool iyo wixii ku tarmay, waxayna ahaan jirtay taasi xeer dhigan aadna loo ilaaliyo oo ay degsatay soomaalidu.

Bal halkaan aan ku soo qaadno qiso ku saabsan xigsisanka iyo xeerkiisa oo hore u dhacday qarniyadii hore, waxayna ka dhacday degmada Dhagaxbuur oo ka tirsan ama ka mid ah dhulka soomaaliyeed oo Xabashidu ay gumeysan jirtay. Qisadii oo dhana waa tan: Nin baa wuxuu guursaday gabar, gabadhana waxaa dhalay nin garyaqaan ahaa oo caan ku ahaa xeer soomaaliga, aqoon dheerna u lahaa caadada. Ninkii gabadhii waa ay ka dhimatay markii muddo la joogay kaddib; ninkaa garyaqaanka ah oo gabadha aabaheed ahaa magaciisana la oran jorey **Ibrahim Dabakar** uma aysan joogin gabadh uu dhalay ama wiilkiisu dhalay, hase ahaatee waxaa uur lahaa naag uu qabay wiilkiisu, naagtii oo weli aan dhalin maalintii dambe waxaa reerkii u yimid ninkii naagtu ka dhi-

matay oo uu la socdo nin uu soo kaxaystay oo garyaqaan ah xeer soomaaligana aad u yaqaanna magaciisana la oran jirey **Xuseen Gaadaco**; wuxuu u soo kaxaystay inuu ka horgeeyo Ibrahim Dabakar oo soddogi ahaan jirey asagoo doonaya in xoolihiisii loo celiyo haddii aan mar loo haynin gabar xiskiisan ah; dhawr maalmood ayaa lays hor fadhiyey, ugu dambaystiina waxaa lagu dhameeyey arrintii in ninkii la siiyo xoolihii uu yaradka u bixiyey oo uu ka bixiyey naagtii ka dhimatay, k a d d i b n a habeenkii way soo galeen oo ciddii ayey la baryeen nimankii xoolaha kaxaysan lahaa. Markii waagii baryey waxaa loo soo soocay xoolihii yaradka ahaa iyo wixii ku tarmay oo geel iyo lo'ba leh; markii xoolihii gaar loo bixiyey oo weli aysan la wareegin nimankii ayaa waxaa fooli qabatay naagtii uu qabay wiilkii Ibrahim Dabakar, arrintaana waxaa ka warhelay Ibrahim Dabakar laftiisa, hase ahaatee Xuseen Gaadaco iyo ninkii qareenka uu u ahaa oo naagtu ka dhimatay xiskiisankana waayey markaasna xoolihii kaxaysan lahaa ma aysan ogaanin arrintaas ah in naagtii foolanayso. Ibrahim Dabakar markii uu ogaaday inay foolanayso naagtii wiilkiisu qabay wuxuu xeeladeeyey nimankii xoolaha kaxaysan lahaa, wuxuuna ku yiri: «gelinka dambe aad ambabaxdeene nala harsada maanta,» xoolahana xoolohoodii kale hayska raaceen, galabta ayaa la soo kaxayne», markaasaa inta gogol loo qaaday nimankii waxaa loo geeyey geed cidda u dhaw; nimankii oo yaaban oo la yaaban waxa loo celiyey, geedkiina fadhiya garanna waayey sababta looga celiyey inay tagaan gelinka hore ayaa waxay maqleen mash-xarad iyo xabbado la riday oo loo riday dabbaaldeg oo loogu dabbaaldegayo naagtii oo gabar dhashay. Xuseen Gaadaco wuxuu yiri asagoo markaas la hadlaya ninkii xoolaha reerka ka kaxaysanayey, gartayna in gabari u dhalatay reerkii markuu maqlay mashxaraddii «reerkii gabar baa u dhalatay, waxay noo celinayeenna xeel bay ahayd ay nala sugahayeen gabadhaas dhalashadeeda»; warkiisi run ayuu naqday oo naagtii ayaa gabar dhashay. Ibrahim Dabakar oo ahaa gabadha dhalatay awowgeed, gabadhii ninkaan ka dhimatayna ahaa aabaheed ayaa

wuxuu yiri, inta u yimid nimankii «nimanyahaw waxaan idiin haynaa gabar xigsiisan ah oo maanta dhalatay, kumana helaysaan xoolihii markaan xeer soomaali»; Xuseen Gaadaco oo u jawaabay wuxuu yiri: «caqligaad naga xadaye, saaka waxaa noo ekayd inaanaan kaa yeelin markii aad na tiri baaqda oo nala hargala maanta, waxaana nala gudboonaa inaan saaka xoolahannagii kaxaysanno iskana tagno, haddana waxaa nala gudboon wixii saaka nala gudboonaa wax aan ahayn, tasoo ah inaan u hoggaansanno xeer soomaaligii ku saabsan xiskiisanka»; halkaas ayaa Xuseen Gaadaco u soo jeediyey ninkii xoolaha kaxaysan lahaa oo horay xiskiisanka loogu waayey inuu aqbalo inuu xiskiisan u qaato gabadha hadda dhalatay, wuxuuna u sheegay in haddii ay u suurta geli weydo asagu inuu guursado gabadhaas, ama uu sugo inta ay ka weynaanayso, ay u bannaan tahay in uu u guuriyo wiilka uu dhalo asagu, ninkiina waa aqbalay arrintaas wayna isaga tageen xoolihii iyagoo iska dhigay niman xigsiisan la siiyey.

Ninkii la siiyo gabar xigsiisan ah, ha yaraato ama ha weynaatoe wuxuu xeerku ahaan jirey inuu aqbalaa asaga ayeyna u joogi jirtay intii uu guri ka geysto, waxaana dhici jirtay mararka qaarkood inay sugto gabadhu ninka xiskiisanka loo siiyey ayadoo aan ninkaaxsanayn, ninkii la taga gabar nin kale xiskiinsan ugu joogta wuxuu ahaan jirey, marka la eego xeer soomaaligii hore nin dembi galay waxaana lagu qaadi jirey xeerka xigsiisan haddii ay suurtoobi waydo in laga soo rido kaddib markii la raacdeeyo, sidaasna uu kula guri galo, waxaa xeerku ahaan jirey in laga qaado geel waxaana la oran jirey geelaas magaciisa **Xoolo Oriyo**, wuxuuna tirsigiisu gaari jirey gobollada qaarkood toddoba halaad, gobollada qaarkoodna wuxuu gaari jirey ilaa iyo 25 (shan iyo labaatan) halaad waxaana geelaas qaadan jirey ninkii gabadhu xigsiisanka ugu joogtay, isla markaasna yarad ayuu siin jirey ciddii gabadha dhashay, cidda gabadha dhashayna waxaa xeer ahaan jirtay in ay gabar siiyaan ninkii gabadha laga boobay, hadday gabar u waayaanna waxay siin jireen xoolihiisii uu yaradka uga baxshay gabadhii hore uga dhimtay.

## XEERKII DUMAASHA

Dumaal waxaa la oranjirey ama haddaba la yiraahdaa ninkii guursada naag uu ka dhintay walaalkiis ama adeerkiis ama ina adeerkiis, waxaana caado ahaan jirtay, xeer soomaaliguna sii adkeeyey dumaashaas. Ujeeddada dumaashunna waxay ahaan jirtay in la daryeelo caruurtii agoonta ahayd iyo in ayna kala go'in xididnimadii hore u dhexmartay ninkii dhintay reerkoodii iyo gabadha reerkooda, haddaba sidaas darteed waxaa dhici jirtay in ay sugto naagu ninka ka dhintay walaalkiis oo ah wiil yar oo soo koraya inta uu ka weynaado ama inta uu ka yimaado asagoo dal kale jirey, waxaana xeerku ahaan jiray inaan nin kale guursan karin naagtaas ninkii dumaasha u lahaa mooyaane, hadduu guursadana waxaa lagu qaadi jirey xeer dhigan, waxayna isku xeer ahaan jireen xiskiisanka, waxaana laga qaadi jirey xoolihii xiskiisanka laga qaadi jirey oo kale, kuwaasoo aan horay u soo sheegnay markaan ka hadlaynay xeerkii xiskiisanka. Ninkii guursada naag nin dumaal ugu joogta wuxuu la xeer ahaan jirey nninkii guursada naag xiskiisan nin ugu joogta.

## NAAG DOONAN IYO XEERKII NINKII LA TAGA

Waxaa dhici jirtey ama haddaba dhacda in nin uu doono gabar asaga oo waydiistay reerkoodii ama ay heshiiyeen asaga iyo ayadu marka horaba, halkaasna uu ku bixin jirey xoolo yarad ah, waxayna sii joogi jirtay reerkooda inta laga ninkaaxinayo ama laga guri geynayo, taas macnaheedu ma aha in ciddooda laga wadi jirey marka la ninkaaxiyo ama la guri geeyo, maxaa yeelay waxaa dhici jirtay inta badan ama caadaduba ahayd inuu ninku kula aqal galo gabadha oo loogu aqal dhiso ciddii ay ka dhalatay dhexdeeda, waxaana loo aqoon jirey Mindhismo ama Inan la yaal.

Naagta doonan waxaa xeerku ahaan jiray in uusan la hadli karin nin kale guur iska dhaafe oo aan ahayn ninkii

ay u doonanayd, wayna ka aana badnayd kana dakana kululayd xigsiisanka iyo dumaasha, hase ahaatee haddii uu nin boob naagtaas oo ayadoo aan laga soo dhigin inta ninkaaxsado uu guri geysto, waxaa lagu qaadi jirey xoolo la'eg xoolihii laga qaadi jirey ninkii gursada naag xiskiisan ugu joogta ama duumaal ugu joogta, nin kale waxayna ahaayeen xoolahaasi toddoba (7) halaad gobollada qaarkood, qaarkoodna (25) shan iyo labaatan halaad, waxaana loo yaqaanay xoolo oriyo, waxaana qaadan jirey xoolahaas ninkii naagtu u doonanayd, waxaana xilo siin jiray asaga ciddii dhashay gabadha lagala tegey iyadoo u doonan, hadday xila u waayaanna xeerku wuxuu ahaa in ay siiyaan xoolihiisii.

## XEERKII YARADKA

Yaradku wuxuu ahaan jirey caado soomaalida oo dhan ay ku dhaqmi jireen, waxaana jiri jirey yarad celis oo asaguna ahaa dhaqan caadadu keentay, xeerka soomaaliyeedna waa adkayn jirey yaradka iyo yarad celiska labadaba.

Waxaa xeerku ahaan jirey in xoolaha yaradka ah aan yarad kale loo sii bixinin ama aan la gadin ama aan la siin cid aan ahayn ciddii yaradka u bixisay markii hore, taasna macnaheedu wuxuu ahaa in la tixgeliyo caadada yarad celiska, maxaa yeelay caadada ayaa waxay ahaan jirtay in loo yarad celiyo xoolihii uu bixiyey ninkii yaradka u bixiyey; haddaan loo celin durbaba waxay ahaan jirtay caadadu inay ku jiraan xoolahaas yaradka ahi ciddii gabadha xeradeeda si hadhow markii gabadhu u baahato ama ninkeedii u baahdo loogu yarad celiyo, sidaas darteed waxaa xeer soomaaligu diidi jirey in xoolaha yaradka ahi galaan gacan saddexaad. Waxaa dhici jirtay, haddii ay galaan xoolaha yaradka ahi gacan saddexaad in uu xumaado xiriirkii xidideynimada oo ka dhaxaysay labada reerood.

Yaradku wuxuu u kala bixi jirey mood iyo nool. Waxa moodka ah waxay ahaan jireen lacagta, dharka, badarka, iyo wixii la cuno oo dhan. Waxyaalahaas moodka ah waxba loogama soo celin jirin ninkii baxshay ayaga cayntoodii.

Noolkuna wuxuu ahaan jirey geela, fardha, lo'da iyo ariga. Buntuqduna waxay ka mid ahaan jirtay noolka.

Haddaba wixii xeerku oggolaa in la celiyo wuxuu ahaa waxa noolka ah. Yarad celiska noolka xeer bay ahaan jirtay inkasta oo meelaha qaarkood ariga ay ku dari jireen moodka oo uusan ka mid ahaan jirin waxyaalaha la yarad celiyo.

Yaradka bixintiisu waxay ahaan jirtay caado soo dureertay wax badan, qadar go'ana ma lahaan jirin. Haddaba ninkii yaradka diida inuu bixiyo xeer bay ahayd in lagu dacweeyo oo geedka lagu keeno. Waxayna ahaan jirtay waxa lagu dacweynayo waxa yarad looga qaato gabdhaha deggan degmadaas uu ka guursaday ninka yaradka diiday, waxaana lagu xukumi jirey ninkaas, markii geedka garta la geeyo inuu bixiyo yarad le'eg yaradka lagu kala qaato degmada uu ka guursaday gabadha, waxaana dhici jirtay meelaha qaarkood inay goostaan xeer u dhexeeya ayaga oo ku saabsan yaradka qaddarkiisa, iyagoo tixgelinaya in yaradku yahay caado lagama maarmaan ah wax badanna soo socotey.

## UJEEDDADA YARADKA

Ujeedada yaradka ma ahayn iib la iibsanayo gabadha ama xoolo laga qaadanayo. Ujeedadu waxay ahayd in gabadha la dhiso ama qoyska is guursanaya oo ka kooban gabadha iyo ninkeeda le dejiyo. Reerka gabadha dhalay markay qaataan yaradka waxay soo celin jireen wixii nool ahaa oo ay yarad u qaateen, isla markaasna wxay ku dari jireen gabadha marka ay u rarayaan ciddii guursatay xoolo ia dhihi jirey dhibaad, kuwaas oo aan lahaan jirin xad u go'an. Wa-

xaa kaloo ka bixi jirey reerka aqaldhis hadday gabadhu tahay mindhismo; aqaldhiskaas wuxuu gaari jirey qiimo aan ka yarayn ama ku dhowba yaradkii laga qaatay.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa dhici jirtay reerkii shan gabdhood lahaa oo shantiiba laga guursaday oo la mariyo caado soomaaliga iyo xeer soomaaliga in reerkaasi cayroobo ama xoolo yereeyo siduu ugu bixinaayo wixii xoolo ahaa oo xeradiisa ku jiray yarad celis, dhibaad iyo aqaldhis, isla markaas reerkii shan wiil lahaa oo shantuba guursadaan, waxaa dhici jirtay in reerkaasi noqdo reer hodan ah ama xoola badan sida loogu soo yarad celinayo ama loo soo dhibaadinayo gabadhii ay guursadeen, taasina waxay ku tusaysaa in gabadha aan yarad lagu iibsan jirin ee ayadu ay reerka kala dhici jirtay xoolo, ama lagu kabi jirey xoolo markii la guursado. Waxaa kaloo ulajeedada yaradka ahayd ama ahaan jirtay inay dhexmarto ama inay isku darmaan labada reer oo kala guursaday dad iyo duunyaba.

Halkaas waxaa ku beenoobay waxyaabihii ay qoreen gumeystayaashii iyagoo ku sheegay yaradka inuu yahay iib la iibsanayo gabadha taasoo ay yiraahdeen gabarba gabar inta ay ka qurux badan tahay ayey ka iib badnayd.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO QOYSKA

Ninkii markuu naag guursado oo meel dego waxaa la dhihi jirey: qoyskii hebel, asaga ayaana ka talin jirey reerkiisa, wixii dhibaato ah oo gaara xaaskiisa waxaa xeer ahaan jirtay inuu sheegto ama u dacwoodo asagu, wuxuu magdhaw ahaan uu soo qaado asaga ayaa ka talin jiray. wixii ay geysato naagta uu qabo oo dhibaato ah oo ay cid kale u geysato asaga ayaa bixin jirey magdhawga dhibaatadaa, haddii asaga ay dhaawac u geysato naagtiisu waxba kama uusan qaadan jirin, haddii asagu dhaawac u gaysto naagta uu qabo waxba kama ayna qaadan jirin magdhaw ah mana aysan dacweyn jirin.

Hase ahaatee, haddii labada is qabta midkood uu dilo kan kale oo qudha ka jaro waxaa laga qaadan jirey magtii, waxaana kala qaadan jirey labada reerood. Haddii ninka naagtiisa la dilo oo ay ku dhimato gacan dad kale waxaa magteeda qaadan jirey reerihii ay ka dhalatay, hase ahaatee asaguna wax buu ka qaadan jirey; hadday caruur u leedahay waxaa qaadan jirey magta caruurta ay dhashay naagtu wax yar mooyaane inteeda kale, waxa yarna waxaa qaadan jirey reerkii ay ka dhaltay. Haddii ninka la dilo oo qudha laga jaro, magtiisa waxaa qaadan jirey reerkii uu ka dhashay, naagtana dhaxal ayaa laga siin jirey, hadduu caruur ka dhintay ninkuna magta waxaa qaadan jirey meesha ay u badan tahay caruurta u ka dhintay ninku inta kalana waxaa qaadan jirey reerkii uu ka dhashay.

Ninku hadduu furo naagtiisa, xeer soomaaligii hore wuxuu ahaan jirey inay rarato aqalka dhammaantiis, waxay kaloo la tegi jirtay meherkeeda iyo wixii ay gaar u leedahay oo xoolaha ka mid ah. Inta ay is qabaan ninka iyo naagtu wixii marasha iyo masruuf ah iyo caruurta masuuliyaddoodaba waxay dusha ka saarnaan jirtay ninka. Haddii caruurta qoyska cidi waxyeelayso, waxaa u dacwoon jirey ninka, hadduu maqan yahayna waa la sugi jirey ilaa uu ka yimaado amase waxaa u dacwoon jirey ragga kale oo qaraabada ah. Haddii ilmuhu wax geystaan ayaguna waxaa bixin jirey magdhawga aabahood; arrintaas ilmaha ku saabsan wax masuuliyad ah kama aysan qaadi jirin naagtu, hase ahaatee waxay ka qayb qaadan jirtay caruurta xanaanayntooda iyo dhaqaalayntooda. Waxyaalahaas waxay ahaan jireen xeer la raaco oo la degsaday, yuusamba qornaanine, waxayna ka mid ahaan jireen arrimahaassu qaybta dhaqanka ee xeer soomaaligii hore, marka loo qaybsho xeer soomaaliga dhiig iyo dhaqan; dhaqankana waxaa loo kala sii qaybin jirey xilo iyo xoolo, arrintanina waxay ka mid tahay qaybta xilaha.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO MAGANTA

Magan waxaa la yiraahdaa dad ku soo magan galay ayagoo kula soo magan galay nafsaddooda ama maalkooda ama xilahooda, iyagoo haddana kaa soo magan galay dad cadaw ah oo eryoonahaya ama ay ka baqeen in uu soo raadsado, ayagoo ku tuhunsan ninka ay magan gelahayaan inuu yahay nin bariin kara ama looga baqi karo agtiisa haddii ay joogaan.

Xeer soomaaligii hore oo ku saabsanaa magantaas wuxuu ahaa mid aad u adag, ninka magantiisa wax la yeelana wuxuu ahaan jiray nin naftiisa wax la yeelay oo kale, ninkii la qaado xoolaha magantiisa ah wuxuu ahaan jiray nin la qaaday xoolihiisa oo kale. Sidaas darteed naf kalama uusan hari jirin ninkii magantiisa wax la yeelo, soomaaliduna sidaas darteed ayey xeer ka lahaan jirtay xeerkaas oo ahaan jirey in aan la faragelin ama aan waxyeello loo geysan ruux magan ah, haddii loo geystana in si degdeg ah loogala xaalo ama looga jidmariyo ciddii magantaas lahayd. Maganta waa looga taxadar badnaan jirey, loogana dadaal badnaan jirey waxyaalaha kaloo dhan si degdeg ah ayaana loo bixin jirey magdhawga wixii maganta la yeelo, waxaana jirtey in marka horaba waxa maganta ah laga leexan jirey sababtoo ah waxaa ceeb ahayd in ninkii wax la yeelo magantiisa uusan ka aargoosan ciddii wax yeeshay haddii si degdeg ah aan maslaxo loogu fariisan, magdhawgiina aan si dhaqsa ah loogu keenin.

Waxaa xeer la goostay ahaan jirtay in maganta la bariiyo ammaanna la siiyo; haddii ay jirto cid dacwo u sheeganaysa ayada oo wax u sheeganaysa in loo kala garbixiyo, haddii ayada wax laga qaadayna loo soo dhiciyo wixii laga qaaday. Farqi ma kala lahaan jirin maganta inay badan tahay iyo inay yartahay. Haddii magantu ay cid kale dekane ka qabto oo ay ka soo carartay in laga aargoosto, ciddii ay ka soo carartayna weydiisato in loo soo gacan geliyo, xeer soomaaligu wuxuu ahaan jirey inaan la oggolaanin waxayna ka dhignaan jirtay

taasi magangeliyada siyaasadeed oo caalamiga ah oo maanta adduunka ka jirta.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO DAAQA DHULKA

Waxaa jiri jirtay waayihii hore in soomaalidii hore qoloba meel degi jirtay sidaas darteedna qolo walba waxaa lagu tixgelin jirey ama looga dambayn jiray daaqa iyo biyaha dhulka ay deggan tahay ayadu, hase ahaatee waxaa xeer ahaan jirtay haddii qolo soo abaarsato ama biyo weydo inay ku soo guuri jirtay dhul dad kale deggan yihiin waxaana xeer ahaan jirtay inta aysan soo guurin inay soo dirsadaan duqow ergo ah kalana xaajoota dadka dhulka deggan sidii ay uga heli lahaayeen daaq iyo biyo iyo sidii laysu nabadgelin lahaa oo uusan dagaal u dhexmareen dadka wax magaratada ah iyo dhallinyarada labada dhinac, waxaana xeer ahaan jirtay in nimankaas la siiyo reerahooda daaq, biyo iyo nabadgelyo intaba, waxayna ka dhignaan jireen reerahaas soo abaarsaday dad magan ah oo kale ama marti ah aad ayaana loo xaq dhawri jirey, waxayna wax ka qaybsan jireen wixii daaq iyo biyo yaalla dhulkaas, waxayna wax uga dhaqmi jireen xeerka gaarka u ah degmadaas ay soo degeen. Markii carradoodii roob ka da'o oo abaartu ka baxdo ayey u guuri jireen dhulkoodii ayagoo mahad weyn u haya dadkii walaalahood ahaa oo ay la barbaxeen, taasina waxay ahaan jirtay xeer soomaalidii hore ka dhaxayn jiray oo ay degsatay, wuxuuna ka dhignaan jiray nidaamka maanta yaalla dunida oo ah in laysu gargaaro. Waxaa kaloo jiri jirey oo soomaalidu xeer u lahaan jirtay wax la yiraahdo kaalmo, waxayna ahaan jirtay taasi markii reero ay cayroobaan ama la dhaco waxaana kaalmayn jiray ama u gargaari jirey degmooyinka u dhow, waxayna siin jireen xoolo ay dhaqdaan iyo xoolo ay qashaan iyo badar haddii ay heli karaan iyo caano intaba, waxaana la dhihi jirey ama loo yaqaanay «xoologooyo» kuma koobnaan jirin dadka qaraabada ah keligood ee waxay ahaan jirtay arrin ka dhaxaysa soomaalida oo dhan inta aan colka ahayn markaas waxayna ahayd xeer la degsaday.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO MARTI GELINTA

**Martigelin** waxaa la yiraahdaa dad socota ah oo ku-soo hoyda cid meel deggan si ay uga helaan waxay cunaan iyo meel ay seexdaan. Haddaba soomaalidii hore waxaa caado u ahaan jirtay inay soo raan martida kusoo hoyata waxayna siin jireen meel ay seexato iyo wax ay cunto. Haddii ay wax kale u waayaan waxay u qali jireen xoolo nool si ay hilbo uga siivaan, sidaas darteed ayaa waxaa dhici jirtay in ninkii safar aadaya oo ka taga soomaali geeska u sokeeya aadayana geeska u shisheeya uusan qaadan jirin wax sahay ah oo uu jidku ku maro, sababtoo ah wuxuu ku tala geli jirey in uusan ka waayeynin wuxuu cuno soomaalida uu sii dhexmarayo.

Haddaba soomaalidii hore waxaa jirtay inay xeer ka dhigeen marti gelinta waxayna noqotay wax laysku eedeeyo oo geedaha garta laysku geeyo, taasoo ahayd ninkii inta nin ku soo hoydo ka seexda ayadoo xoolo u xaraysan yihiin wuxuu ku ashtakayn jiray odayada xeer yaqaanka ah oo deggan meeshaas, xukunkuna wuxuu ahaan jiray in laga qasho ninkaas martida ka seexday wan weyn oo arigiisa ka mid ah ama wax u dhigma hadduusan wan lahayn. Taasu waxay ahaan jirtay gobollada qaarkood oo uu ka mid ahaa gobolka Bari, gobollada qaarkoodna waxay samayn jireen inay canaan u iedíyaar iyo cambaarayn ciddii martida ka seexatay. Waxaa kaloo jirtay, martida hadday tahay rag madax ah in loo qali jiray xoolo inkastoo caano iyo cunta kalaba loo hayo, waxayna taasu ahaan jirtay xeer.

Marka dacwadda la qaadayo ku saabsan marti laga seexday, waxaa la tixgelin jiray wixii dhibaato ah ama nacfi yari ah oo haysatay qoyska ka seexday martida. Haddii qoyska martida ka seexday la yimaado wax loogu garaabi karo oo u keentay inuu martida soori waayo waa laga aqbali jirey, waxaana ka mid ahaan jiray cudurdaarka xoolo la'aan, cunto la'aan ama biyo la'aan iwm.

Waxaa la mid ahaan jiray ka seexadka laga seexdo martida iyagoo si xun wax loo siiyo ama si xun wax loo yiraahdo ama meel xun la fariisiyo. Haddii waxyaalahaas wax ka mid ah lagu smeeyo martida waxaa xeerku ahaa ama ahaan jiray inay dacwooto martidu, waxaana lagu xukumi jirey ciddii waxaas samaysay xeerka meeshaas u degsan xoolo ka qalasho, cambaarayn iwm.

Ragga madaxda ah ama aad loo tixgeliyo aqoontooda iyo caqligooda si gaar ah ayaa loo ixtiraami jirey loona dhaqaalayn jirey, xushmad iyo isxilqaan gaar ah ayaa loo yeelan jiray. Waxaa dhici jirtay in la muraadeeyo ciddii jebisa nidaamkaas madaxdu lahaan jirtay, waxayna ahayd taasu xeer la degsaday. Maraadaduna waxay ahaan jirtay in laga qasho ciddii wax u dhintay nidaamka madaxda neef **Ishkin** ah. Ishkinka waxaa la oran jiray ama haddaba la yiraahdaa geela iyo lo'da. Farqi ma kala lahaan jirin madaxdaasu inay tahay tan qolada wax xumaysay iyo mid ka mid ah qola kale. Martida oo la xumeeyo ama madaxda oo aan la marin mudankeeda waa lesku ceebayn jiray xeerka kasekow, gabayo ayaana laysugu soo diri jirey cay ah, sidaas darteedna waxay ahaan jirtay wax laga baqo.

## KALA AQOONSI

Waxaan hore u soo sheegnay in soomaalidii hore ay dhihi jirtay markii nin soo dacwoodo oo yimaado geedka garta: «waxa aad sheeganayso ma dhiigbaa mise waa dhaqan», hadduu yiraahdo waa dhiig waxay dhihi jireen «ma qudhbaa mase waa qoon»; hadduu yiraahdo waa dhaqan waxay dhihi jireen «ma xilaa mise waa xoolo», hadduu yiraahdo waa xoolo waxay dhihi jireen «ma barbaa mise waa beer». Haddana dhiig iyo dhaqan wax alla wuxuu sheegtaba waxay dhihi jireen «ma maganbaa mise waa mooro».

Sidii aan hore u soo sheegnay markii aan ka hadlaynay

waxa dhiigga la yiraahdo, taasoo aan uga hadlay buugga qaybtiisa hore, dhiigga waxaa la yiraahdaa wixii loo geysto qof bani-aadam ah, qurna waxaa la yiraahdaa markii qofku dhinto oo uu u dhinto waxyeellada loo geystay, qoona waxaa la yiraahdaa markii qofku dhaawac yahay kuna dhaawacmay wax la yeelay. Dhaqan waxaa la yiraahdaa wixii ah madani iyo xeer qoys oo ku saabsan qoyska iyo xoolaha. Xilo waxaa la yiraahdaa naagta la qabo; xoolo waxaa la yiraahdaa wax alla wixii adduun ah nool iyo mood labadaba; mooro waxaa la yiraahdaa wixii adigu aad leedahay, maganna waxaa la yiraahdaa wixii qofku uusan lahayn asagu, hase ahaatee ammaan ku ah asaga. Bar waxaa la yiraahdaa xoolihii nool. beerna waxaa la yiraahdaa beerta.

Waxaan horay uga soo sheekaynay waxyaalahaas badankood iyo waxa xeerku ka qabi jirey, haddana waxaan halka uga hadli doonaa qaybta xoolaha iyo xeerkoodu wuxuu ahaan jiray.

## XOOLO IYO XEER SOOMAALIGII HORE

Soomaalidii hore, mark ay oran jirtay ninka dacwoonahaya «dacwaddu ma xilaa mase waa xoolo», waxay ula jeedi jirtay xoolaha wixii madani ah ama wixii aan ahayn dhiig iyo xilo. Waxaa ka mid ahaan jiray daynka, ammaanada, kirada, baadida laysku qabsado, rahanta, baadi fadka, yaradka iyo wixii la mid ah iyo dhaxalka.

Markii laysku qabsado waxyaabahaas wax ka mid ah ama laysku qabsado xoolo kale oo ay ka dhacdo anaa leh iyo anaa leh, waxaa la oran jiray waxa dacwaddu ka taagan tahay waa xoolo, waxaana marka u horaysaba la raaci jirey habka guud oo u degsanaan jiray qaadista dacwooyinka oo aan horay uga soo sheekaynay, waxaana la cuskan jiray ama ay dacwaddu ku dhisnaan jirtay **Muddaci** iyo **Muddac Caleyhi**, **Marag** iyo **Dhaar**, waxaana lagu dayi jirey marka hore masla-

xo, taasoo ahaan jirtay in kala bar loo qaato waxa leysku hayo iyo ninkii dacwoonahayey inuu iska daayo wixii uu sheeganahayey oo la yiraahdo iska samir. Waxyaalahaas oo dhan waa markii qirasho la waayo, waxaana dhici jirtay in maslaxada la qaato marar badan, taasoo la oran jiray «maslaxa diid midigta ayuu ka jabaa.

Garta waxaa gali jiray inta badan odayaal aad u yaqaanna garta iyo xeerka, waxaana jiri jirtay in odayada qaarkood oo madax ah dadka ay madaxda u yihiin ugu dhamayn jireen dacwadahooda si maslaxa ah.

Halkaan waxaan ku soo qaadaynaa sheeko dhexmartay laba oday oo madax ahaa mid walbana uu qolo madax u ahaa ayna ahaayeen laba garyaqaan waxaana la dhihi jirey magacyadooda Maxamuud Carabey iyo Cali Jiir. Markii ay isu yimaadeen labada oday waxaa dhexmartay sheeko, waxayna wax iska weydiiyeen kana sheekaysteen sida garta loo naqo iyo xeerarka soomaaliyeed guud ahaanba. Cali Jiir odagii la oran jirey wuxuu su'aalay Maxamuud Garrabey «sideebaad garta ugu naqdaa markii ay wax isku qabsadaan laba nin oo tolka ah ama dadka aad madaxda u tahay?» «Maxamuud Garabey wuxuu yiri, isagoo ka jawaabaya su'aashii uu weydiieyey Cali Jiir «haddii ay ii yimaadaan laba nin oo dacwo ka dhaxayso, ahna dadka aan madaxda u ahay, waxaan dhegeystaa dooddooda, markii ay ii baxdo midka jidka leh ayaan waxaan iraahdaa anoo la hadlaya kii jid darraa markaan waaniyo kaddib, faataxada aan kuu maro ama aan kuu duceeyo ee maandhow gar iyo gardarraba iska daa waxaas, aniga ayaa kaa qabsadee, ikhyaarta meesha fadhidana faataxada ha kugu kaalmayso, marka halkaas ayuu ku aqbalaa, mararka qaarkoodna midka jidka leh ama laga jiddaran yahay ayaan waxaan ku iraahdaa sidaas si le'eg, taasna waa markii aan arko inuusan khayr lahayn midka jidka daran, waxa uu qabana oo loo sheeganayo ay yihiin wax aan macna lahayn, isla markaa ninka jidka leh uu yahay nin ikhyaar ah ama xil kas ah.

sidaas ayeyna gartu ku dhammaataa, dood badanna ma sii socoto.»

Cali Jiir wuxuu yiri: «anigu waxaan yeelaa marka ay ii yimaadaan laba dacwo isu qabta oo ah dadka aan madaxda u ahay, waxaan dhegeystaa doodda labada dhinac, waxayna la yimaadaan markhaatiyaal, haddii markhaati la waayana waxaa yimaada dhaar, halkaas ayaana go'aankii ku soo saaraa ninkii ku dhaqmi waayana rafcaan ayuu ka qaataa, sidaas ayeyna ku sii socotaa».

Maxamuud Garabey wuxuu yiri: «qaylo badan iyo qajajac ayaad martaan, dadkiinana waad isku soofaysaan, gartiinana waad dheeraysseen».

Cali Jiir wuxuu yiri: «Maxamuud Garabeyow waa iga tol fiican tahay, dadkaad madaxda u tahayna waa ku abakoon yahay, hase ahaatee igama gar aqoonsanid, igamana xeer aqoonsanid, waxaad uun i dheertahay waxaa ku maqla tolkaaga, kuuna dhaga nugul».

Maxamuud Garabey iyo Cali Jiir waxay kala degganaayeen laba gobol oo kala fog, waxaana u dhexeeyey gobollo badan. Sheekadan waxay ku tusaysaa in odayada qaarkood ay ku dhammayn jireen garta maslaxo, ee aysan garta ku dhammany jirin mar kasta gar cadaawo.

Garta xoolaha ku saabsan, nooc kasta ha ahaadeen xoolahaasiye waa ay ka sahlanaan jirtay kana dood fududaan jirtay garta ku saabsan dhiigga iyo garata ku saabsan xilaha.

## XEERAALE IYO XEER SOOMAALIGII HORE

Xeeraale waxaa la yiraahdaa ama la dhihi jirey xoolaha lagu helo ama lagu shaqeysto qawsaarnimada, taasoo ah in nin uu raaco nin kale xoolihiisa, uguna raaco kiro, waxayna

ahaan jirtay taasu kirada keliya oo laga yaqaanay ama ay taqaanay soomaalidii hore, maxaa yeelay ma jiri jirin soomaalidii hore wax kale oo la kala kiraysto ama la kiraysto taasoo na tusinaysa in awrta la rarto iyo fardaha la fuulo ay ahaan jireen kiro la'aan oo ay dhici jirtay in inta layska caariyeysto laysu soo celin jirey, isla markaasna ma jiri jirin daaro iyo baabuur, maxaa yeelay soomaalidii hore waxay ahaan jirtay qarniyadii hore dad reer guuraa ah. Haddaba xeeraaluhu wuxuu lahaan jirey xeer loo dejiyey kaasoo ahaa in markii qofku raaco xoolaha muddo 12 bilood ah la siin jirey neef ka mid ah xoolihii uu raaci jirey muddadaas, geel ahaa lo' ahaa iyo ari ahaaba; waxaa kaloo uu lahaan jiray qofka qawsaarka ahi cuntadiisa iyo arad baxiisa taasoo ka sarayn jirtay xoolaha uu qaadanayo oo kirada ahaa, taasoo ahaan jirtay xeer la degsaday ciduna aysan khilaafi jirin.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO BEERAHA

Soomaalidii hore waxay u yeeshay beeraha xeer lagu kala xukumi jirey, wuxuuna ahaan jirey mid ku saabsan dhanka soohdinta. Tusaale ahaan haddii laba nin ama ka badan ay meel ka qabsadaan beero, dhinaca ayey isugu qaban jireen soohdintooda, hase ahaatee markii nin beer horay ugu lahaan jirey uu damco in nin kale ka ag samaysto beer waxaa xeerku ahaan jirey in loo sameeyo masaafo, le'eg xarig Yeel la oran jirey, waxaana xariggaas dherarkiisu le'ekaan jirey 9 baac.

Baac waxaa la yiraahdaa labada gacmood oo la kala fidiyey shiyaga iyo dhudhumadoodaba; intii sagaalkaas baac ka shishaysa ayuu ka samaysan jirey ninka cusubi beertiisa. Kaasi wuxuu ahaa xeer ay degsatay beeraleydu, waxaana loo dejiyey in looga hortago is khilaafka, iyo muranka.

Taasi waxay na tusaysaa in soomaalidu wax kasta u yeeli jirtay xeer gaar u ah, sidii aan horeba u soo sheegnay.

Markhaatidu waxay ahaan jirtay, marka la eego xeer soomaaligii hore waxa wax lagu caddeeyo, mana jiri jirin wax kale oo wax lagu caddeeyo markii qofka wax lagu sheeganayo uu inkiro wixii lagu sheeganayey, maxaa yeelay ma jiri jirin wax qoraal la yiraahdo dadkii reer guuraaga ahaa dhexdiisa, sidaas darteed ayuu markhaatigu ahaan jirey waxa keliya oo wax lagu caddaysto, si aad ah ayaana loo baari jirey markhaatiga inuu yahay mid run sheegahaya iyo in kale, inuu yahay mid eexanaya iyo in kale iyo inuu yahay mid dani ugu jirto dacwadda iyo in kale iyo inuu yahay mid ay wax wadaagaan nin ka mid ah ragga dacwaddu ka dhaxayso iyo in kale.

Waxay dhihi jirtay soomaalidii hore marka ay markhaatiga ka hadlayaan «shan nin midna markhaati ma galo, kuwaasoo kala ah: (1) naashaye, (2) lughaye, (3) gacan ku jire, (4) sokeeye, (5) deris».

Naashaye waxay oran jireen ninkii gabari dhashay oo abti uu u yahay ninka uu u markhaati furayo, waxayna uga jeedeen magacaas ah naashaye naaskii uu nuugay. Lughaye waxay oran jireen ninka gabar ka qaba cidda uu markhaatiga u furayo, lugtana waxay ka wadaan tii gabadha uu qabay. Gacan ku jire waxay oran jireen ninkii magan u ah ama qawsaar u ah cidda uu markhaatiga u furayo waxayna dhihi jireen gacantooda ayuu ku jiraa. Sokeeye-na waxay oran jireen ninka ay dhalyaha isu xigaan ninka uu markhaatiga u furayo. Dersina waa la wada garan karaa waxayna uga jeedeen cidda la deggan cidda markhaatiga loo furayo.

Shantaas nin waa laga reebi jirey markhaatiga ama marag furka. Halkaas waxaa laga garan karaa in xeer soomaaligii hore uu ahaan jirey xeer caddaaladda aad ugu dhow, maragtana aad ugu dadaala. Wax alla wixii laysku qabto oo dhiig iyo dhaqan ah waxaa lagu caddayn jirey marag, had-

dii la waayo maragtana waxaa la dhaarin jirey ninka wax lagu sheeganayo. Sidaas darteed ayey dacwaddoodu ku dhisnaan jirtay muddac iyo muddac caleyhi iyo marag iyo dhaar iyo maalka laysku haysto.

## QAYBTII CULUMADA

Culumadu waxay geli jireen go'aanna ka soo saari jireen dacwooyin badan oo dhiig iyo dhaqanba leh, waxayna u badnaan jireen inay galaan waxyaalaha dhaqanka ah xila ahaa iyo xoolo ahaaba, wuxuuna ahaa habka ay wax u geli jireen, in loo geysto dacwadda nin culumo ah oo sharciga islaamka aqoon u leh asagoo jooga gurigiisa ama meel kale, wuxuuna eegi jirey ama baari jirey ninkaas culumada ahi axkaamta islaaamka waxa ay ka qabto arrintaas laysku haysto go'aan ayuuna ka soo saari jirey, mararka qaarkoodna waxaa dhici jirtay in ragga madaxda ahi magacaabaan guddi culumo **ah oo ka kooban dhawr nin, sidaas darteedna guddigaas culu**mada ahi uu wada galo garta loo magacaabay. Waxaa ka furnaan jiray go'aannada ay soo saaraan culumadu rafcaan, waxaana loo qaadan jirey rafcaankaas culumo kale, waxayna socon jirtaty ilaa saddex darajo.

## AJUURADDA DACWADAHA LAGA QAADI JIREY

Waxaa jiri jirtay in laga qaadi jirey dacwadihii soomaalidii hore ujuuro ka geddisan kuwa maanta laga qaato dacwadaha, waxayna ahaan jirtay markuu nin furanayo dacwo in uu dhigto **Gogol**, wuxuuna keeni jirey gogoshaas wax la cuno iyo wax la cabbo, wuxuuna bixin jirey nin walba wixii tabartiisa ah lis iyo loogba, waxaana xeerku ahaan jirey markii hore inuusan waxba bixinin ninka dacwadda loo qabo hase yeeshee waxaa dhacday waayihii dambe in asaguna wax ka baxsho gogosha maxaayeelay waxaa laga baqay in odayadu u dabcaan ninka ay xoolihiisa cuneen, halkaasna ay ka timaaddo eexasho. Arrintaas aan soo sheegnay waxay ahayd

markii garta aan lagu naqaynin geed shir loo fadhiyey oo hore loogu hayey arrima kale, taasoo markaas ay ahaan jirtay xaajadu in lagu dhegeysto garta geedkaas la fadhiyo, ninnana uusan gogol dhiganin.

## XAQUL QALIN

**Xaqul qalin** waxaa la dhihi jirey xoolo ay qaadan jirtay culumadu marka ay garta naqayso waxayna ahaan jireen xoolahaasi xoolo nool ama lacag ama dhar, waxaana bixin jirey labada dhinac oo dacwaddu ka dhaxayso. Odayada magaalada garta ka naqi jirey ayaguna inta badan waxay qaadan jireen xaqaul qalin, hase ahaatee xaqul qalinkoodu wuxuu ahaan jirey labaatan shilin iyo waxa la mid ah waxayna ku magacaabi jireen magacyo soomaali ah waxaana ka mid ahaa **Hagarbey, Gogol** iyo **Agabare.**

## KHARAJKA DACWADDA

Soomaalidii hore markay garta naqayso sida badan kama aysan soo qaadi jirin kharajka dacwadda wax macna leh, sidaas darteed ninkii garta ku adkaada ama loo xukumo ma heli jirin kharaj waxaana sababtu ahayd laba arrimood:

1) iyadoo aysan ku bixi jirin ninkaas masaariif uu ka cuno jeebkiisa maxaa yeelay waxaa wax siin jirey cidaha uu dhex joogo inta ay gartu socoto, taas oo ahayd caado soomaali jiri jirtay waxaana ceeb ahaan jirtay in laga seexdo martida.

2) iyadoo ay diidanaayeen ama ay diidi jireen soomaalidii hore in dacwaddu sii socoto ama lays jiidjiido. Waxaa dhici jirtay in ninka garta helay uu iska qaato wixii loo xukumay oo keli ah ee uusan ku dacwoonin ama sheegan wax la yiraahdo kharaj.

## XEER SOOMAALIGII HORE IYO KACAANKA

Kacaanku wuxuu bilaabay in fiiro gaar ah loo yeesho xeer soomaaligii hore wixii waqtiga la socon kara, waxaana kacaanku xeeriyey ama soo saaray xeer ku saabsan in dadweynuhu ka qaybgalaan Maxkamadaha Garta lagu naqo taasoo fursad u siisay qof kasta oo wax garad ah inuu ka qaybgalo maxkamadaha marka garta ay soorayaan.

Dimoqraaddiyadda caynkaas ah oo uu ku tilaabsaday Kacaanka soomaaliyeed waxay ka timid ama laga soo qaatay xeer soomaaligii hore waxaana jiri jirtay in soomaalidii hore markay garta naqayso uu ka qaybgali jiray nin kasta oo wax garad ah.

Waxaa kaloo Kacaanka barakaysani ku dhaqaaqay inuu baabi'iyo xeerarkii ajnabiga ahaa ee wax lagu xukumi jirey oo uu isticmaarku dejiyey ugana tegey dalka, kuwaasoo khilaafsanaa ama aan la socon karin dhaqanka iyo caadooyinka soomaaliyeed, wuxuuna kacaanku dejiyey xeerar farabadan oo lagu tixgelinayo caadooyinka iyo dhaqanka soomaalida waxaana kacaanku baabi'iyey wixii xeer soomaaligii hore ka mid ahaa oo aan la socon karin waqtiga oo ay ka mid ahaayeen magtii qabiilka lagu bixin jirey, xiskiisankii iyo dumaashii khasabka ahaan jirey iyo yaradkii.

## GABAGABADII BUUGGA

Soomaalidii hore xeerarkeedii waxay ahaayeen wax farabadan, lagumana soo koobi karo buuggaan, waxaana nasiib darro ah inuusan jiri j i r i n qoraallo taas oo keentay in aan la helin go'aanadii iyo garnaqii faraha badnaa oo dhici jirey maalin walba, meelihii yaraa oo qoraalku jireyna oo ay ka mid ahaayeen magaalooyinka iyo tuulooyinka, nasiib darro waxaa noqotay inaan la helin wixii ay qoreen.

Wuxuu sheegay nin la oran jirey **Ibnu Batuuta** oo ahaa nin dal mareen ah yimidna soomaaliya sannadku markuu ahaa 1331 oo ah sannadka dhalashada nebi Ciise, ninkaas oo u dhashay carabta reer Maqrib in waqtigaas uu tegey magaalooyinka Muqdisho iyo Seylac, waxaana xukumahayey Muqdisho markaas dawlad soomaaliyeed waxaana madax ka ahaa sudaan Abuukar Sheekh Cumar, waxaana shir lagu qaban jirey daarta suldhaanka galab kasta oo Sabti ah waxaana ka soo qeybgeli jirey shirkaas, garsooraha maxkamadda u sareeyaa oo ku fariisan jirey kursi u gaar ah; waxaa kaloo ka soo qaybgeli jirey shaqaalaha dawladda, Wasiirada Dawladda, Madaxda baladka, culumada diinta, madaxda jeeshka iyo odayada magaalada, wqtigaas oo laga joogo 645 sano waxaa xaqiiqo ah in dawladdaasi wax qori jirtay maxkamado iyo xafiisyana lahayd, hase ahaatee lama hayo wixii ay qoreen iyo xeerkoodii iyo kukunnnadoodii ay soo saari jireen, waxaana aan shaki ku jirin in uu baabi'iyey ama uu gubay waxyaalahaas oo dhan gumeysigii reer Yurub oo dalka haysan jirey, waxayna dadkaasi wax ku qori jireen ama far u ahaa carabiga waxayna ahaayeen dad muslim ah oo ku dhaqma diinta Islaamka waxayna ka soo jeedeen ama ka mid ahaayeen umadaha carbeed waxaana ku tusinaysa middaas marka aad akhriso **waxa uu qoray Ibin Batuuta in soomaalidu ka mid ahayd weligeed** umadaha carbeed, hase ahaatee gumeysigu kala lumiyey.

Waxaan shaki lahayn in soomaalidu ahaan jirtay dad sare kuna dhaqmi jirtay xeerar ay degsatay iyo shareecada islaamka labadaba waxayna ahaan jirtay dad nabad jecel, waxayna ku maahmaahi jirtay «Haddii midigtaada lagula qabsado waa laga muddacaa», taasoo macnaheedu yahay in haddii aad aragto wixii aad adigu lahayd oo qof kale haysto ama uu ku doodayo anaa leh, laguma boodo ama xoog laguma doonto ee si nabadgelya ah ayaa loo raadsadaa.

Xeer soomaaligu wuxuu soo maray heerar badan iyo

waqtiyo kala duwan waxaana loo qaybin karaa waqtiyaadii ka horeeyey gumeysiga iyo waqtiyadii gumeysiga iyo waqtiyadii musuqmaasaqa iyo waqtiga kacaanka.

Xeer Soomaaligii hore wanaagiisu ama waqtiyaduu ugu wanaagsanaa waxay ahayd intii ka horreysay gumeysiga, maxaa yeelay soomaalidii si xoriyad ah oo ayan cidna ka baqayn ayey u fikiri jireen waxna u qaybsan jireen, waxaana jirtay in qarniba qarnigii ka horreeyey uu u qabay in uu xeerka iyo Gar naqaba uga badiyey, waxayna dhihi jireen: «Rag waa raggii hore, hadalna waa ku yiri.» arintu si kastaba ha ahaatee waxaan shaki lahayn oo loo baahanyahay in dib loo baaro xeer kii soomaalidii hore, maxaa yeelay wax weyn ayaa laga faa'iidaysan lahaa, haddase buuggani halkaan ha ku ekaado asaga oo ah kii ugu horreeyey noociisa.

**BUUGAAGTA HOOS KU QORAN WAXAA QORAY QORAAGA BUUGGAN**

1. Habka guurka shalay iyo maanta
2. Mudane garuun magac iyo maal midna kama tagin
3. Ladnaanta ayaa gumeysiga ii loogtay
4. Dadaalkii goobbe hawaa la gudoontay
5. Afartii is gaftay
6. Cigaal Shiidaad iyo sheekooyinkiisa

Waxayna yaalaan buugaagtaan Akadeemiyaha Dhaqanka, waxaana loo gudbin doonaa Madbacadda sii loo daabaco.